DOCUMENT RESUME

ED 403 372 UD 031 529

TITLE Ku Soo Dhawaada Dalka Mareykanka. Buugga tusmadda Qaxootiga. (Welcome to the United States. A Guidebook for Refugees).

INSTITUTION Center for Applied Linguistics, Washington, DC. Refugee Service Center.

SPONS AGENCY Department of State, Washington, DC. Bureau of Population, Refugees, and Migration.

PUB DATE 96

NOTE 121p.; For English version, see ED 402 361. Photographs may not reproduce well.

AVAILABLE FROM Refugee Service Center, Center for Applied Linguistics, 118 22nd Street N.W., Washington, DC 20037 (English and other language versions; (202) 429-9292; fax: (202) 659-5641).

PUB TYPE Guides - Non-Classroom Use (055)

LANGUAGE Somali

EDRS PRICE MF01/PC05 Plus Postage.

DESCRIPTORS *Acculturation; Adult Education; Civil Rights; Cultural Awareness; Elementary Secondary Education; Employment; Health; Housing; *Immigrants; Immigration; Language Proficiency; *Refugees; Relocation; *Social Services; Somali

IDENTIFIERS *Somalia

ABSTRACT

This guidebook provides Somali-speaking refugees being resettled in the United States with general information about what they will encounter and the services they can receive in their first months in the country. The book is distributed to overseas processing agencies, refugees overseas who have been approved for U.S. admission, and service providers. Refugees are advised that most Americans value self-reliance and individual responsibility, but that in general people respect those who ask questions about the new culture they are entering. All refugees are assigned to a relocation agency as they arrive in the United States, and housing is made available for the first month. The following topics are addressed: (1) pre-arrival processing; (2) the role of the resettlement agency; (3) community services; (4) housing; (5) transportation; (6) employment; (7) education; (8) health; (9) managing your money; (10) rights and responsibilities of refugees; and (11) cultural adjustment. Among the topics discussed is that of the American educational system, both for children and adults. A general outline of the public school system includes a discussion of the American tradition of public participation in education. A map of the United States is included. (SLD)

****
* Reproductions supplied by EDRS are the best that can be made *
* from the original document. *
****

KU SOO DHAWAADA

DALKA MAREYKANKA

Buugga tusmadda Qaxootiga

ED 403 372

U.S. DEPARTMENT OF EDUCATION
Office of Educational Research and Improvement
EDUCATIONAL RESOURCES INFORMATION CENTER (ERIC)
X This document has been reproduced as received from the person or organization originating it
☐ Minor changes have been made to improve reproduction quality
• Points of view or opinions stated in this document do not necessarily represent official OERI position or policy



PERMISSION TO REPRODUCE AND DISSEMINATE THIS MATERIAL HAS BEEN GRANTED BY
D Christian
C A L
TO THE EDUCATIONAL RESOURCES INFORMATION CENTER (ERIC)

Somali

BEST COPY AVAILABLE

KU SOO DHAWAADA
DALKA MAREYKANKA

Buugga tusmadda Qaxootiga

Daabacaaddii Koowaad
1996

Waxaa diyaariyey Xarunta Barashada Luuqadaha
(Center for Applied Linguistics)
Qaybteedda Adeegga Qaxootiga

Waxaa Turjumay Anab Ali Shire

Casharadda buuggaan waxaa lagu soo saarey oo lagu daabacay wada-shaqeynta iyo heshiiska Dowladda dhexe ee Mareykanka qaybteeda Dadweynaha, Qaxootiga, iyo Hijradda. Siddaas daraadeed buuggaan ma aha daabacaad ay dawladdu si rasmi ah u soo saartey.

Buugga dhamaantiis dib waa loo daabici karaa, hase yeeshee sawiradda iyo hadaladda la soo xigtey looma isticmaali karo daabacaad kale ama ujeeddo kale ayadoon laga haysan ruqsad hay'addihii ku tabarucay.

Wakiilo ka kala socda hay'addahaan hoos ku qoran ayaa ka qayb galay qorida buuggaan *Ku soo Dhawoow dalka Mareykanka: Buugga Tusmadda qaxootiga*:

African Services Committee of New York
Center for Applied Linguistics
Church World Service
International Catholic Migration Commission
International Institute of Erie, Pennsylvania
International Organization for Migration
International Rescue Committee
Iowa Department of Human Services
Jewish Family Services of Baltimore
Lutheran Social Services of the National Capital Area
Lutheran Social Services of Fargo, North Dakota
Maryland Office of Refugee Affairs
Office of Refugee Resettlement
Refugee Services Alliance of Houston
United States Catholic Conference
World Relief Refugee Services

Hay'addaha ku tabarucay sawirada iyo hadalada la soo xigtey waa kuwan soo socda:

Sawirada: Arizona International Refugee Consortium, Inc.
Center for Applied Linguistics
Lutheran Social Services of Fargo, North Dakota
Lutheran Social Services of the National Capital Area
PhotoDisc Inc.

Hadalada la soo Xigtey:

Scattered Children (Save the Children Refugee Programs)
Bosnian Refugee Resettlement in the U.S.—Part II: Refugee Response (Center for Applied Linguistics)

Jaldiga iyo Nakhshadda waxaa sameeyey SAGARTdesign

Ku soo dhawoow dalka Mareykanka: Buuggan tusmada qaxootiga wuxuu ka caawinayaa qaxootiga la dejiyo dalka Mareykanka warbixin guud oo ku saabsan waxa ay la kulmi doonaan iyo adeegyada ay u baahan yihiin bisha ugu horeysa ee ay dalka joogaan. Ujeeddada buugaan waa in uu ka caawiyo qaxootiga degaya dalka Mareykanka in ay fahmaan xaqiiqda iyo waxa ay ka filayaan ha ahaato xag shaqo, waxbarasho, caafimaadka iyo xaalado kale oo ku saabsan nolosha dalka Mareykanka.

Buuggaan waxaa lagu qorey agaasinka dowladda Mareykanka qaybta Dadweynaha, Qaxootiga iyo Hijradda (U.S. Department of State Bureau of Population, Refugees and Migration). Mas'uulo xafiiseed oo ka socda dowladda dhexe iyo tan goboladda, wakiilo ka socda hay'addaha dib-u-dejinta, iyo qaxootiyo dalka la dejiyey dhawaan fikrado ayeey ku biiriyeen qorida buuggaan.

Tusmadan *(Soo dhawoow—Welcome)* waxay ku qoran tahay luuqaddo badan, waxaana loo qaybiyaa hay'addaha waddanka Mareykanka dibaddiisa jooga ee u sameeya qaxootiga howlaha dib-u-dejinta, kuwaasoo siiya qaxootiga loo ogolaado in ay degaan dalka ee aan weli u dhamaan barnaamijkooddii. Waxaa kaloo loo qaybiyaa hay'addaha dib-u-dejinta ka caawiya qaxootiga ee dalka gudihiisa, si ay u ogaadaan warbixinta qaxootiga ay caawinayaan loo soo sheego inta aysan imaan dalka Mareykanka.

Ku soo dhawoow dalka Mareykanka: Buuggaan tusmadda qaxootigu wuxuu bedelay daabacaad horey qaxootiga loogu sameeyey oo la oran jirey *Buugga Dib-u-dejinta Qaxootiga ee Dalka Mareykanka.*

Hordhac **3**

Gogoldhig **5**

1—Imaatinka ka hor **11**

2—Kaalinta hay'adda dib-u-dejinta **21**

3—Adeegyadda bulshadda (Mid gaar ah iyo mid Dowladeed) **27**

4—Guryeynta **33**

5—Gaadiidka **41**

6—Shaqo **47**

7—Waxbarasho **69**

8—Caafimaad **81**

9—Qorsheynta laćagtaada **89**

10—Xuquuqda iyo mas'uuliyadaha qaxootiga **97**

11—La qabsashada dhaqanka **105**

Buuggaan ku saabsan dib-u-dejinta qaxootiga wuxuu kaa caawinayaa sidii aad isugu diyaarin laheyd in aad la qabsato nolosha bilaha kuugu horeeya ee lagu dejiyo dalka Mareykanka.

Wuxuu kuu sharxayaa marxaladdaha dib-u-dejinta wuxuuna ku siinayaa warbixin aasaasi ah ee ku saabsan nolosha dalka Mareykanka. Ma jiro buug soo koobi kara waxyaalaha aad u baahan tahay in aad ogaato oo dhan, sababtoo ah dib-u-dejintu waa marxalad aad u dheer una adag; qof kasta oo qaxooti ahna wuxuu u aqbalaa noloshaan cusub si u gooni ah.

Haddii aadan fahmin wax ku qoran buuggaan ama su'aalo aad ka qabto nolosha Mareykanka aaney ku qorneyn buuggaan; marka aad dalka Mareykanka timaadid waxaa kula raadinaya oo kaa caawinaya in ay kuu helaan jawaabihii aad u baahneyd, shaqaalaha hay'addaada dib-u-dejinta.

Haddaba waxaa lagama maarmaan ah in aad la timaado maskax furan iyo u diyaar garoow in aad ogaatid ama baratid waxyaalo cusub, kororsatana waayo-aragnimo; wax aadan aqoonin weydiintoodu waa waxyaalaha ugu qiimo badan ee kaa caawinaya inaad si hagaagsan ula qabsato noloshaada cusub ee dalka Mareykanka.

Waxaan idiin rajeyneynaa guul.



BEST COPY AVAILABLE

Dalka Mareykanka waa dal baaxad weyn oo kala duwan, is barbar dhigidiisuna ay adag tahay. Dalku wuxuu leeyahay xuduudyo kala bara goboladda dhexdooda oo joqoraafi ahaan ay ku kala duwan yihiin. Guud ahaan cimiladda dalku aad bay ukala duwan tahay.

Dadka Mareykanka ah waa dad jinsiyado kala duwan leh, midabo kala duwan, dhaqamo iyo caadooyin kala duwan oo bulsho walba u gaara ah, waxayna leeyihiin diimo badan oo kala duwan iyo waxyaalo kale oo ay aaminsan yihiin qiimeeyaana. Sidaas daraadeed waxaa suurtogal ah in aysan run aheyn warbixinta iyo waxyaabo badan oo aad ka maqashey dalka Mareykanka adigana ayşan kuu socon karin. Waxaa suurtogal ah warbixin badan oo aad ka maqashey saaxiibadaa ama dad kale oo kaaga soo horeeyey dalka in ay adiga kuu meel mari weydo.

Bulsho kasta ee ku nool dalka Mareykanka way ka duwan tahay midba mida kale waxeyna leedahay dariiqyo iyo habab ay ula shaqeeyaan qofka cusub ee ku soo biiray bulshadaas. Shaqaalaha hay'adda dib-u-dejinta ayaa kaa caawinaya sidii aad u baran laheyd wadankaaga cusub iyo bulshadda aad ku dhex nooshahay.



BEST COPY AVAILABLE

Casharka ugu horeeya ee aad si dhaqsa ah uga baraneeysid dadka Mareykanka waxa uu yahay in ay qiimeeyaan isku kalsoonidaada iyo mas'uuliyaddaada qofnimo. Waxaa lagaa filayaa in aad shaqo u hesho sida ugu dhaqsaha badan aadna taageertid naftaada iyo tan qoyskaaga. Luuqadda Ingiriiska oo aadan aqoon kaama hor istaageeyso in aad shaqo hesho laakiin waxa aad u baahantahay in aad luuqadda si fiican u barato si aad u hesho shaqo kale oo ka fiican. Inta badan meelaha qaarkood waxaad ka heleysaa fasalo aad wax ka baran kartid kana kororsan kartid aqoon si aad u gaartid horumar.

Casharka labaad ee aad baran doontid ama ogaanaysid waa in dib-u-dejintu ay tahay go'aan rasmi ah. Marka hore waxaad noqonaysaa qof ku leh degenaasho rasmi ah kadibna dhalashada dalka Mareykanka ayaad qaadaneeysaa. Hal sano marka aad degenaatid dalka waxaad xaq u leedahay in aad dalbatid degenaanshaha rasmiga ah. Afar sano iyo bar marka aad joogtid waxaad xaq u leedahay in aad dalbatid dhalashada dalka Mareykanka.

Qaxooti ahaan waxaa suurtagal ah in wax walba ay kaa dhumeen, laakiin Mareykanka marka aad timaadid waxa aad heleeysaa fursad kale oo aad noloshaadii mar labaad dib ugu bilaawdo uguna dhisato nolol cusub. Haddaba nolol cusub oo dib loo bilaabayo ma sahlana laakiin waa la sameyn kartaa. Waxaad ogaataa in kabadan hal malyan oo qaxooti ah ay kaaga soo horeeyeen, intoodii badneydna ay ku guuleysteen, adigana waad sameyn kartaa. Waxaa wanaagsan in aad la timaado dadaalkaaga iyo khibradahaaga laguu hibeeyey, aadna ku dhaqanto dhaqankaaga, iskuna dhiiri geliso sidaad nolol fiican u bilaabi laheyd.

Qaxootigii adiga kaa soo horeeyay waxaa laga yabaa in ay wadaageen talooyinkaan soo socda:

- La imaaw qalbi furan.
- Ha ku ordin in aad go'aan degdeg ah gaarto.
- Ku dadaal in aad barato kuna hadasho luuqadda Ingiriiska.
- Isku day in aad fahanto dhaqanka dadka Mareykanka adigoon dhaliilin ama is barbar dhigin kaaga iyo kan Mareykanka.
- Ka qayb qaado nolosha taal Mareykanka.
- Ahmiyadana sii in aad aqoonsato waxa aad soo martay iyo meesha aad hiigsaneyso.
- Shaqo raadso sida ugu dhaqsaha badan, sameysana qorshe kale si aad u hesho shaqo wanaagsan mustaqbalka.

Casharadda soo socda waxay ka kooban yihiin warbixino ku saabsan noloshaada cusub iyo wadankaaga cusub, kuwaasoo kaa caawinaya sidii aad dib ugu degi lahayd dalka. Warbixintaan waa mid kooban oo aan faahfaahin badan lahayn. Haddaba xusuusnow in dadka Mareykanka ah qiimeeyaan in uu qofku isku tashado ama isku filaado, haddana aad bay u xushmeeyaan qofkii wax uusan garaneeyn su'aala, waana sida ugu wanaagsan ee lagu bilaabo in lagu barto wax aadan aqoon.

BEST COPY AVAILABLE

Hadda oo ay ku aqbashay laanta Socdaalka iyo Dhalasho siinta (INS) ee dalka Mareykanka, in aad tagtid dalka, waxaa lagaa doonayaa in aad marto arrimo dhowr ah inta aadan u socdaalin dalka Mareykanka.

- Waa in aad martaa baaris caafimaad adiga iyo qoyskaaga.
- Waa in hay'adda dib-u-dejinta dalka Mareykanku u diyaar garowdaa imaatinkiina, si ay idiinkugu sahlanaato dejintiinu.
- Waxaa la diyaarin doonaa socdaalkiina Mareykanka kadib markii la dhameeystiro dhamaan waxyaabihii la idiinkaga baahnaa dib-u-dejintiina.

Inta aad sugeeysaan dib-u-dejinta, shaqaalaha ku shaqada leh ayaa kaa caawin doona sameynta balanta baarista caafimaadka, isla markaana waxay hubinayaan in hay'addaada dib-u-dijintu ay haysato warbixin sax ah ee ku saabsan adiga iyo qoyskaaga, iyo in ay diyaariyaan safarka ilaa iyo inta aad ka gaareyso magaalada aad u socoto dalka Mareykanka.

Inta aadan safarka gelin, haddii aad u baahan tahay usha curyaamiinta ama kursiga dadka cagaha la', iyo dadka waayeelka ah ama mucaawinooyin kale ee ku saabsan safarkaaga la socodsii hay'adda socdaalkaaga shaqada ku leh. Inta aad sugeysid safarka waxaad wanaagsan in aad fursad u hesho in aad wax ka barato dalka aad u socoto iyo luuqada Ingiriiska.

Baaris Caafimaad

Waxaa loo baahan yahay adiga iyo qoyskaaga in aad martaan baaris caafimaad.

Baaristu inta badan waa lacag la'aan. Baarista caafimaadka ujeeddadeedu waa sidan soo socota:

- In la ogaado haddii ay jiraan dhibaatooyin caafimaad waxna laga qabto ka hor inta aadan u kicitimin dalka Mareykanka.
- In la hubiyo in aysan jirin marxalad caafimaad daro ah oo kaa hor istaagi karta adiga iyo qoyskaaga in aad u dhooftaan dalka Mareykanka
- Iyo in la siiyo hay'adda dib-u-dejinta ee ku sugan dalka Mareykanka, warbixintaada caafimaad daro ee u baahan daba gal markaad ku soo biirto bulshadaada cusub.

Haddii aadan ku dhoofin muddo hal sano gudaheed ah laga bilaabo maalinta lagaa qaaday baarista caafimaadka waa in aad mar kale caafimaad martaa ka hor inta aadan u dhoofin wadanka Mareykanka.

Wareeysi Dhoofitaanka ka Hor

Hawl wadeenada ayaa ku wareysan doona si ay u helaan warbixin, taasoo fududayneysa dib-u-dejintaada. Haddii ay jiraan qaraabo ama saaxiibo kuu deggan dalka Mareykanka waxaa lagu weydiinayaa magacyadooda, cinwaankooda iyo lambarka taleefankooda. Haddii ay horay u deggan yihiin xaaskaaga ama caruurtaada dalka Mareykanka, waxaa lagu dejinayaa isla magaalada ay deggan yihiin. Haddii qaraabada kuu deggan dalka Mareykanka aad xoogaa kala fog tihiin sida ina adeerkaa oo kale ama aad weydiisato in aad degto meel saaxiibkaa uu ka dhow yahay, hay'adda dib-u-dejintu waxay go'aansaneysaa in laguu bedelo iyadoo tixgelineysa in macluumaadka adeegga ee loo baahan yahay laga heli karo iyo in aad shaqo ka dhex heli kartid bulshada meesha deggan dhexdeeda. Waad codsan kartaa in isku meel la idin dejiyo adiga iyo qaraabadaada hadii iyagana loo ogolaaday in dib loo dejiyo dalka Mareykanka, laakiin wax balan qaad ah majiraan in hawshaas la fulinaayo.

13

Inta aadan dhoofin ka hor si wanaagsan u xaqiiji in aad siiso warbixin sugan hay'adda ku shaqada leh si ay hay'adda dib-u-dejintu go'aan fiican uga gaarto meesha lagu dejinaayo. Marka aad soo gasho dalka Mareykanka dhibaato weyn ayaad kala kulmi doontaa in aad si dhaqso ah ugu guurto meel cusub. Sababta oo ah guuristaas deg degta ah waa qaali, sidoo kale adeega dib-u-dijinta waxaad ka heli kartaa meesha marka hore lagu dejiyay oo kaliya.

Hay'adda Dib-u-dejinta

Hay'adda dib-u-dejinta ee ku sugan dalka Mareykanka gudihiisa waxay qaabilsantahay in ay ku caawiso xiliga aad ku cusub tahay dalka. Hay'addu waxay helaysaa warbixin ku saabsan taariikh nololeedkaaga iyo kan qoyskaaga, magacyadiina, da'diina, shaqooyinkiina, jinsiyadiina, wadankaad u dhalateen iyo diintiina. Waxay kaloo hay'addu ka warqabi doontaa dhibaatooyinka caafimaad daro ee u baahan in la daba galo iyo cinwaanadda qaraabooyinkiina horay u deggan dalka Mareykanka. Hay'adda dib-u-dejinta ayaa kuu doori

doonta magaaladaad degi lahayd iyadoo tix gelin doonta in aad reerkii horay kuugu deganaa dalka Mareykanka la degi doonto iyo fursadaha shaqooyinka iyo adeega ee laga helo magaaladaas. Waxaa laguu sheegi doonaa meeshii aad ka degi laheyd wadanka Mareykanka ka hor intaadan imaan. Hay'addu waxay kuu xaqiijin doontaa in ay kugula kulmi doonto gegida dayuuradaha isla markaad soo cago dhigato, in guriga aad degi doontid diyaar kuu yahay iyo adiga oo heli doona wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan bulshada cusub ee aad ku soo biirtay. (Waxaad faah faahin dheeraad ah ka heleysaa tuducda labaad waxqabadka hay'adda dib-u-dejinta.)

U socdaalida dalka Mareykanka

Waxaa suurta gal ah in aad diyaarsan kartid safarkaaga ama aad weeydisan kartid shaqaalaha ku shaqada leh arimaha safarka. Haddii ay noqoto in aad adigu diyaarsato waxaa lagaa doonayaa in aad la socodsiiso hawlwadeenada qorshaha safarkaaga ka hor inta aadan bixin.

Haddii hay'adda samafalku kaa bixiso lacagta tigidka waxaad ogaataa in ay kugu tahay amaah (deyn) lagaana doonayo in aad dib ka bixisid. Intaadan dalka Mareykanka aadin waxaad saxiixi doontaa warqad balan qaad ah in aad dib ka bixin doonto qiimaha tikidka. Markaad joogtid seddex ilaa iyo lix bilood dalka Mareykanka waxaa laguu soo diri doonaa warqad (biil) ku xasuusinaya in aad bixiso qaar ka mid ah deyntii lagugu lahaa taasoo qaadaneysa mudo seddex sano ah oo ah waqtiga ugu danbeeyo ee aad lacagtaan ku dhameystiri kartid. Lacagta aad dib u bixiso waxaa lagu caawin doonaa qaxooti kale ee u soo safraya dalka Mareykanka.

Sida dadka ku safraya shirkaddaha diyaaradaha caalamiga oo kale, adiga iyo qoyskaaga waxaa loo ogolyahay qofkiiba culeys xadidan. Weydii shaqaalaha ku shaqada leh sharciga saxda ah ee looga dhaqmo shirkadda dayuuradda aad ku dhoofi lahayd. Boorso dheeri ah ama culeys ka baxsan intii laguugu tala galay, adiga ayaa iska bixinaya waana qaali. Haddii aad qaadaneysid xayawaanka rabaayadda ah waa in aad bixisaa kharashka safarka iyo canshuurta dalka Mareykanka, iyo in aad fuliso qaanuunka diyaarada ee ku saabsan qaadashada xayawaanka. Waxaa muhiim ah in aad la socodsiisid hay'adda ku shaqada leh dhoofitaankaaga haddii aad qaadaneeysid xayawaan, si ay hay'adda dib-u-dejinta ee dalka Mareykanka gudihiisa ay isku daydo in ay kuu raadiso guryaha ogol in xayawaanka lagu xanaaneeysto.

Qaybta (wakaaladda) canshuuraha ee dalka Mareykanka ma ogola in dalka la soo geliyo waxyaabaha qaarkood, sida: daroogo, miro sida tufaaxa IWM, dhir (abuur), khudrad iyo hilib. Daawo la socota warqadda dhakhtarka waa lasoo gelin karaa laakiin waa in ay ku dhegantahay waraaq caddeeyneeysa habka loo isticmaalayo.

Haddii aad wax su'aal ah ka qabtid waxyaabaha la ogolyahay in dalka Mareykanka lasoo gelin karo weydii howl wadeenada ku shaqada leh dhoofkaaga.

Haddii safarkaagu uusan ahayn mid toos ah oo meelo badan loo sii maraayo, inta badan waxaa ku caawin doona hay'adda caalamiga ah ee hijrada (IOM). Haddii aad la kulanto dhibaato inta aad ku jirto safarka (tusaale ahaan, haddii uu jirrado qof qoyska ka mid ah), wakiilada hay'adda caalamiga ee hijrada (IOM) ayaa kaa

caawin doona isla markaana ogeeysiinaya hay'adda dib-u-dejinta haddii uu safarkaaggu dib u dhacay. Dalka Mareykanka dhexdiisa wakiilada hay'adda caalamiga ee hijrada (IOM) ayaa kugula kulmi doona gegida dayuuradaha, waxeeyna kaa caawin doonaan nidaamka laanta socdaalka ee lagaaga baahanyaahay. Waxey kaloo kaa caawin doonaan isku xirka dayuurada meesha aad u socoto haddii loo baahanyahay ama ay muhiim tahay.

Intaadan dhoofin ka hor waxaa lagu siin doonaa dukumeentiyaal lagaaga baahanyahay in aad dalka ku gashid ee ka kooban socdaalka, caafimaadka iyo waraaqo kale oo ku saabsan dib-u-dejinta. Ka taxadar in aysan kaa lumin xiliga aad ku jiro safarka waxaa lagaa doonayaa in aad waraaqaha ku qaadato gacanta ee aadan ku ridin boorsada dharka; hana furin dukumintiyaasha. Dokumintiyaashaana waa in aad u dhiibtaa sarkaal ka socda laanta socdaalka marka ugu horeeya ee aad soo caga dhigato garoon dayuuradeed oo ku yaal dalka Mareykanka. Saraakiishaas ayaa furi doona si ay u hubiyaan dokumintiga ku jira bashqadda qaar ka mid ahna kuu soo celinaya. Hay'adda dib-u-dejintuna waxay ku weeydiin doontaa markii aad timaado meeshii laguugu tala galay koobi (nuqul) dukumiintigii aad waday, waxayna ka sameysanayaan nuqul (koobi).





BEST COPY AVAILABLE

Barnaamijka dib-u-dejinta ee Mareykanka waa barnaamij qiimo leh, waxaa iska kaashada dowlada iyo hay'addaha madaxa banaan. Dowlada ayaa u dejisa sharciyada iyo nidaamyada wax loogu qabanayo qaxootiga, islamarkaasna maalgalisa addeegyada qaarkood. Hay'adda dib-u-dejinta waxay u soo gudbiyaan qaxootiga adeegyaddii loo baahna, inkastoo iyaguna ay bixiyaan macaawinooyin kale oo dheeraad ah.

Qof kasta oo qaxooti ahaan looga aqbalo dalka Mareykanka waxaa lagu xirayaa oo hawshiisa ogaanaya hay'ad dejisa inta uusan wadanka soo galin. Hay'addaasi waxay noqon kartaa mid diineed, mid madax bannaan ama mid dowladeed ama mid mujtamac gaar ah leeyihiin. Hay'adda lagula xiriiriyaa waxay xafiis iyo shaqaale ku leeyihiin magaalada lagu dajiyo ama meel u dhow. Haddii aad qaraabo ku leedahay deegaankaas waxay kaa caawin karaan dib u degistaada. Hay'addaha qaarkood waxay leeyihiin dad iskaa-wax-u-qabso ku shaqeeya oo ka caawiya qaxootiga degistooda.

Inkasta oo hay'addaha qaarkood yihiin kuwa diini ah hadana kuma khasbanid in aad qaadato diinta ay aaminsan yihiin ama ka qaybgasho; hay'addaha qaxootiga caawiya way ka reeban yihiin in ay ku dhiirigaliyaan qaxootiga diinta ay fidinayaan.

Marka aad timaado garoonka diyaaradaha ee magaaladda aad degayso waxaa kaa hor imaanaya qof qaraabo ah, saaxiib ama wakiilka hay'adda dib-u-dejinta si laggaaga caawiyo dib u degiddaada. Guri aad degtid waa laguu diyaarinayaa. Guryeyntaan waa mid waqti yar soconeysa. Waxay noqon kartaa in si ku meel gaar ah laguula dejiyo qoyskaaga, hoteel lagu dejiyo, ama guri aad waqti dheer degenaato sida guryaha dabaqyada ah ee la kireesto. (Guryeynta iyadoo faahfaahsan waxaan ku qaadaneynaa casharkeena 4aad.)

Shaqaalaha hay'adda dib-u-dejinta ama qaraabo haddii aad ku leedahay magaalada ayaa kaa caawinayaa sidii aad u kala baran lahayd mujtamaca cusub ee aad ku soo biirtay. Waxyaalaha ay kaa caawinayaan waxaa ka mid ah:

- Sidii aad ku heli laheyd deegaan waqti dheer aad degenaato.
- Sidii aad u heli laheyd alaabta guriga la dhigto iyo dhar.
- Sidii aad ku soo qaadan laheyd kaarka badbaadada bulshada, waxaa lagu siin marka hore rasiit (kaasoo cadeynaya in aad dalbatay kaarkaas si aad shaqo u raadsato).
- Sidii aad u baran laheyd isticmaalka gaadiidka dadweynaha.
- Sidii aad u baran laheyd Mareykanka caadooyinkiisa iyo sharciyadiisa.
- Sidii aad caruurtaada iskuul ku gayn laheyd.
- Sidii aad shaqo ku heli laheyd.

- Sidii aad u fahmi laheyd nidaamka lacageed ee Mareykanka.
- Sidii laguugu diyaarin lahaa baaris caafimaad, aadna u heli laheyd daryeel hadii loo baahdo markii aad timaado.
- Sidii aad ku heli laheyd fursad aad ku barato luuqada Ingiriisiga ama u heli laheyd macalimiin iska-wax-u-qabso.
- Sidii aad u ogaan laheyd adeegyadda bulshada ee deegaanka aad ku nooshahay.

Hay'addaha dib-u-dejinta qaxootiga waxay kuu xaqiijinayaan in lagu siin doono kharashka lagama maarmaanka ah sodddonka berri ee ugu horeeysa ee dalka lagu dejiyo. Ururada qaarkood kharashka aad gasho ayey toos u siiyaan ciddii kugu laheyd, ama toos ayey adigga ama qaraabadaad wakiilatay, waxaana lagaa rejeynayaa in kharashka qaar bixiso ama dhamaantiis. Intaa waxaa dheer hay'adda dib-u-dejintu waxay kuu wadaysaa ugu badnaan muddo 90 beri ah talo siin. Intaas wixii ka danbaya taakuladda ururku waxay ku xirnaanaysaa xaaladaada shaqsiyadeed iyo ururka aad la xiriirtay sharuudaha u yaala. Waxaa laga yaabaa in lagula xiriirsiiyo ururo kale oo talo dheeraad ah ku siin kara, si aad u gaarto waxyaalaha aad u baahaneyd oo gaarka kuu ah.

Hay'adda dib-u-dejintu masuul kama aha bixinta kharashyadaadda iyo deymaha lagugu leeyahey. Waxaad u baahantahay in aad shaqeeyso si aad isugu filaato dhaqaale ahaan.

Haddii aad damacdo in aad u guurto meel kale kharashka guurista adiga ayaa iska bixinaya. Hay'addaada dib-u-dejintu masuul kama aha in ay kuu bedesho hay'ad kale, hay'adda meesha aad u guurtayna shaqo kuma laha in ay ku caawinto. Go'aankaaga guurista adiga ayuu kali kugu yahay sida aad u daryeeli laheyd. Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan guuritaankaaga la xiriir shaqaalaha hay'adda dib-u-dejinta.

Dadka Maraykanka ah waxay qiimayaan in qofku isku kalsoonaado ama isku filaasho gaaro, waxaana lagaa filayaa in aad ka faa'iidaysato inta aad ku nooshahay dalka Maraykanka oo aad mustaqbal fiican ka dhisto si aad guul uga gaarto dib-u-degidaada. Taasi waxay ku xiran tahay dabeecaddaada, dadaalkaaga iyo macaawinooyinka aad hesho.

BEST COPY AVAILABLE

Caawinta aad ka helayso hay'addaada dib-u-dejinta waxaa kuu sii dheer barnaamijyo kale oo macaawino ah oo kuugu tala gashay dowladda dhexe iyo wakaaladdaha u qaabilsan adeegyadda bulshadda si qofka qaxootigga ah naftooda wax ugu qabsadaan. Qaxootigu waxay xaq u leeyihiin addeegyo macaawino oo xag maaliyadeed iyo mid talosiinba ah markii loo baahdo. Goboladda dalku macaawinadda ay siiyaan qaxootiga iyo siyaabaha loo helo way ku kala duwan yihiin.Waxaa muhiim ah in aad ogaato macaawinooyinka la siiyo qaxootiga iyo meelaha laga dalbado, hay'addaada dib-u-dejinta ayaa kaa caawin doonta siddii aad ku heli laheyd macaawinooyinkaan.

Waxaa jira urruro siiya qaxootiga macaawinooyin ku meel gaar ah oo waqti yar kuu soconaya inta aad shaqo ka heleyso si aad isku filaansho u gaarto. Helidda macaawinadda waxay ku xiran tahay sida baahidaadu tahay, iyadoo laga baaraan degayo dakhliga ku soo gala, meesha aad degan tahay, da'da iyo su'aale kale oo badan; haddii ay xaaladaadu isbedesho ama aadkeeni weydo cadeyntii lagaaga baahnaa, waxaa laga yaabaa in lagaa jaro macaawinaddii ama la yareeyo.

Hay'addaada dib-u-dejinta waa meesha ugu horeysa ee aad ka helayso warbixinta iyo siddii aad ugu xirmi laheyd mujtamaca. Shaqaalaha hay'adda iyo shaqooyinka ay kuu qabanayaan waxay kala xiriiri doonaan urruro badan oo ay ka mid yihiin kuwan soo socda:

Ururradda Iskaa-wax-u-qabso—Ururraddaan waxay ka jiraan bulshooyin badan, waxaana aasaasey qaxootigii kaa soo horeeyey si ay u caawiyaan bulshadooda. Ururraddaan qaarkood waxey qaxootiga iyo dadka dalka



ku cusub siiyaan, oriyenteyshan (hanuunin), gaadiid ay raacaan, dhar, iyo qalabka guryaha.

Wakaaladdaha Adeegga dadweynaha—Waxay dadweynaha dan yarta ah iyo qaxootiga u qabtaan shaqooyin muhiim ah, oo ay ka mid yihiin gargaarka dhaqaalaha ee la siiyo dadka dakhliga soo galo aad u yar yahay, dadka aan guryaha laheyn iyo curyaamiinta, iyo dadka madaxa wax uga dhiman yihiin.

Machadyada diimaha ku shaqadda leh—sida kaniisaddaha, masaajidyadda, kaniisadda yuhuudda. Ururraddan uma shaqeeyaan oo kaliya in wax lagu caabudo, ee waxay bixiyaan macaawino ama shaqooyin kale. Qaarkood waxay leeyihiin maktabadaha wax lagu

akhristo iyo fasalo wax lagu baro caruurta maalmaha feestooyinka (sabtidda iyo axadda). Qaarkood waxay dadka u qaybiyaan dhar iyo alaabta guryaha la dhigto. Qaarkoodna waxay u sameeyaan barnaamijyo dadka dalka ku cusub iyo dadka waayeelka ah.

Shaabadaha cuntadda lagu gato (Food Stamps)—waa barnaamij dowladda dhexe ugu tala gashey in lagu nafaqeeyo dadka dakhligoodu hooseeyo. Dadka qaxootiga ah xaq bay u leeyihiin in ay dalbadaan shabadahaan, waxayna ka dalban karaan xafiisyadda dowladda ee loogu tala galay ee degmadda ay degan yihiin. Dadka codsanaya mucaawinaddaan waa in ay buuxiyaan shuruudaha looga baahan yahay, buuxiyaanna fooman, cadeeyaanna maaliyadda soo gasha iyo warbixin ku saabsan naftoodda. Caadiyan shaabadahaan waxay ku xiran tahay qoyska inta uu tiro le'eg yahay iyo dakhliga ku soo gala intuu dhan yahay. Shabadahaan waxaa lagu gadan karaa oo kaliya cunto, laguma gadan karo alaabta aan cuntadda aheyn sida, sigaarka, khamriga, dabaxirka caruurta, alaabta waraaqaha ka sameysan iyo saabuun.

Macaawinadda Tamarta (korontadda)—waa barnaamij dowladda dhexe ku caawiso dadka dhaqaalahoodu hooseeyo si ay isaga bixiyaan kharashka kululeeyaha guriga (heating). Qaxootiga xaq bay u leeyihiin in ay ka dalbadaan macaawinaddan xafiisyadda loogu tala galey, waana inuu buuxiyaa foomamka, keenaana cadeymaha looga baahan yahay ee ku saabsan dakhliga soo gala iyo cadeymo kale.

Macaawinadda lacagta (cash assistance)—barnaamijkaan waxaa loo qorsheeyay dadka shaqo heli waayey; waxaa maamula dowladda hoose ee

magaaladaas, mujtamucuna wuu ku kala duwanaan karaan macaawinka ay bixiyaan. Siddoo kale qaxootigu wuu buuxsan karaa macaawinadaan haddii ay cadeeyaan sababta ay u raadsanayaan. Macaawinadaan waxay soconaysaa bilo xadidan, inta badan waxaa shardi ah oo lagaa doonayaa in aad si firfircoon u raadsato shaqo kana qayb gasho barnaamijyadda lagu tababaro shaqaalaha.

Dakhliga badbaadinta waayeelka iyo naafadda (SSI)—barnaamijkaan waa mid dowladda dhexe ugu tala gashay dadka da'doodu tahay 65 iyo kan ka weyn 65 sanno ama dadka indhaha la' iyo naafadda.Qaxootigga xaqa u yeesha macaawinadaan waxaa laga doonayaa in ay ka dalbadaan xafiiska badbaaddada bulshadda (Social Security office), kaasoo ah meesha laga bixiyo kaarka badbaaddada bulshadda (Social Security card).

Booliiska—ayaa wixii sharci ah shaqo ku leh, ilaaliyana nabadgalyadda dadweynaha.Waxaa jira waxyaalo kale oo booliisku qabto sida gargaarka degdegga ah, iyo in ay ka shaqeeyaan meelaha dambigu ku badan yahay si ay u

balaariyaan xiriirka ka dhexeeya dadweynaha, waxay caawiyaan dadka ka dhuma meeshay u socdaan, kuna toosiyaan dariiqoodda.

Bulsho kasta waxay leeyihiin waax qaabilsan **dab damiska iyo gargaarka degdegga ah**. Haddii aad u baahato gargaarka degdegga ah, waxaad waci kartaa telefoonka lambarkiisu yahay **911**, kasoo gobollada intiisa badan isticmaalaan lambarkaan. Markii aad waceyso 911 (xaalad degdeg ah oo khatar ah), waa in aad usheegtaa qofka ka jawaaba teleefoonka dhibaatada ku heysata nooca ay tahay sida, boolis in aad u baahan tahay, dabdamis ama aambilaanso (baabuurka gargaarka degdegga ah) iyo meesha aad degan tahay cinwaankeedda. Haddii aadan luuqadda Ingiriiska si fiican u aqoon oo aadan sharxi karin dhibaatadda ku heysata, waxaad ku celcelisaa caawimaad «help» ama gargaar degdeg «emergency» hana daminin teleefoonka si ay ugu sahlanaato helitaanka cinwaanka aad ka soo waceyso.

Aad bey u wanaagsan tahay in aad ogaato isticmaalka adeegyadda ka jira mujtamaca aad ku dhex nooshahay, waxeyna kuu sahleysaa sidii aad ula qabsan laheyd nolosha dalka Mareykanka. Haddii aad qaraabo ama saaxiibo ku leedahay dalkana aad baad u nasiib badan tahay waayo iyagaa aad kuu caawinayo.

Haddii aad u baahan tahay in aad ogaato addeegyadda kale ee bulshada hesho waxaan ku sharxi doonaa casharka 7aad (waxbarashadda) iyo casharka 8aad (caafimaadka).



BEST COPY AVAILABLE

Markaad timaadid dalka Mareykanka waxaad u imaaneeysaa gurigii aad ku degi laheyd oo kuu diyaar ah. Waxaa suurtagal ah in lagu dejin doono guri ay yaalaan qalabka muhiimka ah ee aad u baahantahay ee lagama maarmaanka ah, waxaadna deris la noqon doontaa dad dhalashooyin kala duwan leh ahna dad noloshoodu meel dhexaad tahay una shaqeysta. Gurigaaga ugu horeeya oo lagu dejiyo waxaa laga yaabaa in uu yahay ku meel gaar waxaa suurtagal ah in aad la noolaatid dadkii ku dejiyay sida qooyskaaga oo aad degtaan guri dabaq ah ama qolal badan, hoteel ama xarumaha dadka lagu soo dhaweeyo (Inta badan hay'adda dib-u-dejinta ayaa xiriir la leh). Haddii aad keli tahayna waxaa laga yaabaa in lagula sii dejiyo qaxooti keli degan (single) si ku meel gaar ah.

Hay'adda dib-u-dejinta waxay mas'uul ka tahay in ay xaqiijiso sidii aad ku heli laheyd guri lagu dejiyo bisha ugu horeeysa ee aad timaado dalka Mareykanka. Waxaa laga yabaa in laga codsado ehelkaaga sidii ay guri kuugu diyaarin lahaayeen, waxaana suurtagal noqon karta in ay ka helaan taakuleeyn dhinaca maaliyada hay'adda dib-u-dejinta.

Markii aad timaado dalka Mareykanka ayaa lagaala hadli doonaa ama lagula qorsheyn doonaa degaankii aad si joogta ah u degi laheyd. Marmarka qaarkood aad bey ugu adagtahay dadka Mareykanka ah in ay helaan meeshii ku habooneyd oo ay rabeen adigana waxaa laga yaabaa in ay kugu adkaato sidaad u heli laheyd meeshii aad jeclayd. Inkastoo guriga lagu dejin doono uu yahay mid aad awoodid kiradiisa hadana waxaa suurtagal ah in uusan aheyn dookhaaga. Markii aad guri raadineysid

waxaa lagaa rabaa in aad ka baaraan degtid meesha uu ku yaalo nooca guriga aad raadineeyso (dabakh ama guri gaaban), inuu iskuul u dhow yahay, shaqada, meesha ugu dhaw ee aad ka raaci karto gaadiidka dadweynaha iyo in ay u dhow yihiin dukaamo. Waxaad u baahan doontaa in aad la hadasho ama kala tashato hay'adda dib-u-dejinta qof ehelkaaga ah, saaxiibadaa ama qof kale oo kaaga soo horeeyay meelaha ku haboon in guryo laga raadsado. Xusuusnow in guri raadintiisu aysan sahlaneeyn ayna qaadan doonto dhowr todobaad (usbuuc).

Mujtamaca Mareykanku waxay qabaan dhowr nooc oo guryo ah:

- Guryo dabaqyo ah.
- Guryo gaagaaban oo hal qoys ah.
- Guryaha baabuurtu jiidaan (trailer homes).
- Hal qol oo ku dhex yaal guri ama guri dabaq ah.

Halka aad ka heleeyso warbixinta guryaha:

- Saaxiibadaa
- Dadkaad isla shaqeeysaan
- Hey'ada dib-u-dejinta
- Tabeelayaasha lagu dhejiyo guryaha hortooda oo cadeeynaya in guri banaanyahay "For Rent"
- Xafiisyada guryaha lagu kireeyo ee ku dhex yaala xaafadda.
- Joornaallada qaybta iidhehda iyo ogeysiiska.
- Xafiisyada dilaalka guryaha (waxaa laga yaabaa in lagaa qaado lacag shaqada laguugu qabto).

Guryaha dabaqyada ee la kireeyo waxay ka kooban yihiin kushiin leh makiinada cuntada lagu kariyo waaskada weelasha lagu dhaqdo, firinjeer, musqul, hal ama laba qol iyo wixii ka badan, armaajooyinka derbiga ku dhex dhisan, barsada fadhiga iyo qadada. Guryaha dabaqyada ah ee ka yaryar kuwaan inta badan qolalku waa isku furanyihiin.

"Anagga waxay noo aheyd guri dabaq ah oo aad u qurux badan, alaab badan ay taalo waligeyna ma arag ayadoo kale..."

Maanta waxaan ogaadey in dadka ku nool meelahaan aggagaarkeyga ah ay yihiin dad aad faqiir u ah. Guryuhuna aad u yaryar yihiin ciriirina yihiin....

Laakiin wadajir caruurteyda iyo anigu waxaan nadiifiney oo xoqney darbiyada guriga ilaa qoraxda iftiimkeedu ka ifo meelaha daciifka ah, waxaana ku diirsaney raaxadda gurigeena cusub".

Dhaqaalaha ku soo gala bishii inta badan waa kirada guriga marka loo fiiriyo kharashkaaga kale ee aad isticmaasho bishii. Gobol walba iyo magaalo kasta ee dalka Mareykanka wuxuu leeyahay qiimo ka duwan kan kale ee ay ku kireeystaan guryaha.Bulshooyinka isla degan hal meel waxey bixiyaan kirooyin kala duwan. Waxaa laga yaabaa guryaha qaarkood in kiradu ku jirto qarashka korontada kululeeyaha ama qaboojiyaha, biyaha, gaaska cuntada lagu kariyo, qashinka la qaadayo, kuwo qaarkoodna gooni ayaa loo bixiyaa kharashkaas oo dhan. hadaba waa muhiim in aad weeydiiso qofka guriga kaa kireeynaya in kharashkaas kirada ku jirto iyo in kale inta aadan saxiixin foomka kirada guriga.

Markii aad rabtid in aad guri kireeysato waa in aad saxiixdaa heshiiska kirada guriga, waa waraaq sharci ah oo ilaalineysa xaqa qofka guriga kireystay (kireeyste) iyo kireeyaha.Warqadaan sharciga ah waxay kaa ilaalinaysaa in qofka guriga kaa kireeyay uusan kuula dhaqmin si aan caddaalad aheyn. Sharciga guryo kireynta ee dalka waa in kireeyaha (qofka guriga iska leh) uu u sameeyo sharciyo xaddidan oo lagu ilaaliyo nabadgelyadda iyo nadaafadda guriga lagaa kireeyay. Waraaqda heshiiska guriga kiradiisa waxaad ku ogaanaysaa qodobadan soo socda:

- Tirada dadka guriga ku noolaanaya.
- Waqtiga lagaa doonayo kirada in aad bixiso (caadiyan waa inta u dhaxaysa1da ilaa 5ta bisha).
- In aad nadiifinaysid guriga adigoon meelna ka jebin.
- Inta bilood ee aad ku jiri doontid guriga (caadiyan waa 12 bilood).
- Shuruudaha joojin kara heshiiska guriga.

Waraaqda heshiiska guriga waxaa la socda ee lagaa doonayaa in aad keento caddeyn sida aad kirada u bixin doontid (ilaha dhaqaale). Haddii aadan shaqeyn waxaa lagaa doonayaa in aad hesho qof kula saxiixa heshiiska. Dadka guryaha kireysanaya waxaa laga doonayaa in aay bixiyaan lacag dabaaji (curaar) ah marka ay saxiixayaan heshiiska. Dabaajigu inta badan wuxuu la mid yahay bil kiradiis, lacagtaan dib ayey kuugu soo noqoneeysaa marka aad ka guurto guriga hadii aad shuruudihii heshiiska kirada guriga fulisay.

Haddii aad jebiso heshiiskii kirada guriga ee aad saxiixday waxaa lagaa saarayaa guriga, lacagtii dabaajiga aheydna way kaa lumeeysaa (laguuma soo celinayo).

BEST COPY AVAILABLE

Gaadiidka dadweynaha waa kala duwan yahay dhamaan dalka Mareykanka, magaalooyin badan waxay qabaan nidaam gaadiid waasac ah sida basas, tareenadda dhulka hoostiisa mara ama tareenadda u safra meelaha dhow dhow sida joogtada ah kuwaasoo u sahlaya dadka aan baabuurta laheyn in ay noloshooda ugu shaqeystaan. Tagsi (Taxi) waa laga isticmaalaa laakiin waa qaali lacagta lagu raaco. Waxaa jira meelo aan ku badneyn gaadiidka dadweynaha ama si sahlan looga helin gaadiid. Sidaas daraadeed marka aad dalka Mareykanka timaadid hay'addaada dib-u-dejinta ayaa ku siineeysa warbixin faahfaahsan ee ku saabsan gaadiidka dadweynaha ee xaafadaas aad degi doontid.

Meelaha aan laga helin ama uu ku yar yahay gaadiidka dadweynaha waxaa wanaagsan in aad heshid gaari sida ugu dhaqsaha badan. Haddaba waxaa jira mas'uuliyado iyo sharciyo badan ee laga doonayo qofkii raba in uu gaari ku kaxeeyo dalka Mareykanka. Si aad ugu wadato baabuur dalka waa in aad raacdaa sharciyada wadidda baabuurta, waxaad u baahantahay shatiga (laysinka baabuurta) lagu kaxeeyo ee gobolkaas aad degantahay.

"Maalin dhaweyd waxaan raacey bas (gaadiidka dadweynaha) . . . geesaheygaan fiiriyey waxaan arkey dad noocyo kala duwan ah. Dad cad, dad madow oo Afrikaan-Ameericaan ah, iyo dad asalkoodu Isbanish yahay. Qofna qofka kale ma daneyneyn,qofna qofka kale ma fiirineyn, kuma dheygagsaneyn mana tilmaameyn. Aniguna xataa baskaan saarnaa qof wax yar i daneeyay oo i fiiriyey ma arag sidaan u ekaa."

Inta badan gobolada Mareykanka waxaa lagaa doonayaa in baabuurkaagu caymis (insurance) ku jiro. Waxaad ogaataa shatiga (laysinka) caalamiga ah in aan la'ogoleyn in aad baabuur ku kaxeeyso ee la doonayo in aad qaadato laysinka gobolka. Da'da ugu yar ee baabuur lagu kaxeyn karo way ku kala duwan yihiin goboladda dalka Mareykanku. Haddaba laysin (shatiga) kaxeynta baabuurta waxaad ka heleysaan xarunta (qaybta) laga xukumo gaadiidka gobolka, kadib marka aad ku baastid imtixaan qoraal ah, mid indhahaaga araggooda lagu hubinayo iyo mid lagu fiirinayo habka aad baabuurka u wadi kartid.

New York → Los Angeles	(2,911 Miles/4,684 Kilometers)
New York → Chicago	(818 Miles/1,316 Kilometers)
New York → Miami	(1,325 Miles/2,132 Kilometers

BEST COPY AVAILABLE

Haddii aad rabtid inaad gadato gaari waxaad maskaxda ku haysaa in aad u haysid kharashyadan soo socda:

- Caymis—goboladda dalku way ku kala duwan yihiin qiimaha lagu ceymiyo gaariyada waxeyna fiiriyaan qofka gaariga wadaya in uu horay baabuur ugu kaxeyay dalka, haddii ay kuugu horeyso markaas qiimuhu wuu ka badan yahay kan hore ugu kaxeyay baabuur dalka.
- Sidii aad u xanaaneyn laheyd baabuurka.
- In aad ka fekerto shidaalka gaariga.
- Shatiyadda (leysinyada) gaariga diiwaangelintiisa, baaritaanka lagaaga baahanyahay ee baabuurta laga jeegareeyo, iyo in aad bixiso canshuuraha.
- Iyo in aad ka fekerto meeshii (garaash) aad gaariga ku xareysan lahayd (jidka ama gudaha).

Shatiga (leysinka) gaariga lagu wado ma ahan mid waligii kuu jiraya (wuu dhacayaa) waxaa lagaa rabaa in aad si caadi ah u cusbooneeysiiso markuu kaa dhacaba. Haddii aad jabiso sharciyada wadidda baabuurta, ogsoonoow in lagaa qaadayo shatiga (laysinka) wadida baabuurka tusaale ahaan haddii aad waddo baabuur adoo khamri soo cabay waxay keeni kartaa in shatiga lagaa qaado, midda kale haddii ganaaxyo badan oo jabinaya sharciga wadida baaduurta lagu siiyo ama xabsi lagugu xukumo waxay keeni karaan in lagaa qaado shatiga (leysinka).

HELP WANTED
CALL FOR APPT 683-9035
TRUCK DRIVERS
CLASS A VA. DL REQUIRED
Blue Bird School

Dalka Mareykanka waxaa aad looga qadariyaa in qofku uu shaqeysto. Sidaa daraadeed, in aad shaqo hesho iskuna filaato waa waxa ugu qiimo badan ee laga doonayo qofka cusub ee qaxootiga ah ee ku soo biiray dalka. Waxaa lagaa filayaa in aad shaqo kasta qaadatid xataa haddii aysan ahayn shaqo lacag badan laga bixiyo ama ay ka duwan tahay tii aad horey u soo qaban jirtay.

Haddaba himiladaada ugu horeysa markii aad timaado dalka waa in ay noqotaa sidii aad ku heli lahayd shaqo. Inkastoo laga yaabo in aad caawin ka heshid hay'adaha loo aasaasay in ay qaxootiga u raadiyaan shaqo haddana waxaa kaaga muhiimsan in aad adigu saartid awood dheeraad ah sidii aad ku heli lahayd shaqo. Dowlada iyo haya'ddaha dib-u-dejintu ma balan qaadi karaan in ay shaqo ku siiyaan ama kuu helaan. Waxaad xasuusnaataa in adiga iyo kuwa kaleba ay u tartamayaan isku shaqo; waxaa fiican in aad la timaado ama muujiso niyad furan in aad diyaar u tahay in aad shaqeysato.

Shaqadaada ugu horeysa waxay ka mid noqon doontaa shaqooyin badan oo aad dalka ka qabsan doontid, shaqadaas waa mid muhiim kuu ah waayo waxaad samaysanaysaa in aad khibrad dalka Maraykanka shaqooyinkiisa u leedahay. Luuqada Ingiriiska haddii aad si fiican uga barato iskuul iyo dhexgal dadka Mareykanka, waxaa laga yaabaa in aad hesho shaqo ka fiican tii aad qaban jirtay oo ka lacag badan. Waxaa adiga kuu wanaagsan in aad ka shaqeyso shaqada ugu horeysa ugu yaraan lix bilood si aad uga dhisato khibrad

shaqooyinka dalka, waxaana muhiim ah in aad isku daydo sidii aad ugu hadli lahayd luuqada Ingiriiska meel kasta oo aad joogto, ha ahaato shaqadda ama mujtamaca dhexdiisa.

Dalka Mareykanka rag iyo dumarba waa la shaqeyaa; haweenkuna waxay la mid yihiin ragga, waxayna qabtaan shaqo la mid ah midda raggu qabto oo heer walba leh. Inkastoo ay suurtagal tahay in dalkaagii haweenku aysan shaqayn, dalkaan Mareykanka way ka shaqeyaan, waana lagama maarmaan in labada qof (qoyska) ay wada shaqeyaan si ay u helaan dhaqaale ka yimaada labada dhinac oo ay isku filaansho xag dhaqaale ah u gaaraan. Caruurta da'doodu ka weyn tahay shan iyo tobon sanno waxaa loo ogol yahay in ay qabtaan shaqo aan joogto ahayn ama shaqo saacado yar la qabto maalintii. Inta badan dadka dhalinyarada ah waxay shaqooyinkooda ugu horeeya bilaabaan iskuulka markii ay ka soo rawaxaan ama waqtiyada iskuulaadka la fasaxo (la xiro).

Hamigaagga ugu horeeya waa in uu noqdaa sidii aad shaqo ku heli lahayd, noocay doonto ha noqotee; kadibna waa in aad awoodda saartaa sidii aad ku heli lahayd shaqooyinkii aad ku hamiyaysay. Waxaad u baahan tahay in aad xirfad aqooneed kororsatid si aad u hesho shaqo fiican ama aad ugu biirtid shaqooyin cusub oo ka duwan kuwii aad taqiinay iyo xirfad cusub, ama hadii aad rabtid in aad shaqadaadii hore ee aad dalkaaga ka qaban jirtay waa in aad taqaanaa xirfado cusub ee aad ku qabato shaqadaas iyo dalkaan nidaamkiisa shaqo. Haddaba sidii aad ku gaari lahayd hamigaagga waa in aad si taxadar leh u qorshaysaa una fahantaa xirfadaha looga baahan yahay magaalada oo shaqo fiican lagu helo iyo in aad barato waxyaalaha khaaska ah ee lagaa doonayo in aad ku qabsato howshaas. Sidaas daraadeed waxaa lagama maarmaan ah in aad la timaado samir badan waqtigaan aad isu diyaarinaysid sidii aad ku gaari lahayd hamigaagga, waxaa laga yabaa in aad caawin ama warbixin ka heshid la taliyaha shaqada ee mujtamaca aad dhex degan tahay, waxaa kaloo cawin ka heli kartaa hay'addaada dib-u-dejint ama kuliyadaha mujtamacu ka barto tacliimaha sare ama jaamacadaha.

Dhamaan markaan isku soo aruurino waxaad xasuusnaataa in dalka Mareykanka loo yaqaano dhulkii fursadaha badnaa haddii aad adigu tahay qof aad u shaqeysanaya. Dadka Mareykanka intooda badani waxay aaminsan yihiin in dadka waaweyn ay shaqaystaan oo ay isku filaansho garaan, caawiyaana naftooda iyo midda qoyskooda intii ay ku tiirsanaan

lahaayeen lacag macaawino ah oo ay ka helaan dowladda. Dadka qaxootiga ah intiisa badan waxay isku wadaan shaqadii iyo barashadii luuqada Ingiriiska, sababtoo ah luuqada oo aad si fiican u barataa inta badan waxay kuu fududaynaysaa in aad hesho shaqooyin ka fiican kuwa aad qabato. Marka ugu horeeya ee aad timaado dalkaan noloshu aad bay kuula qalafsanaaneysaa ama adkaanaysaa, laakiin waqti markaad joogtid waxaad baranaysaa wadankaaga cusub iyo fursadaha aad ka heli kartid ee aad wax ku qabsan karto.

Shaqo helid

Sida aad u dhaqanto ama aad isu ekeeysiiso ayey ku xirantahay sida aad shaqo aad ku heli laheyd, loo shaqeeyaha ama qofka shaqada ku siinaya wuxuu fiirinayaa sida aad u labisan tahay iyo dabeecadaadu sida ay tahay. Xataa haddii aadan aqoonin luuqadda Ingiriiska ama aad wax yar ku hadashid way wanaagsan tahay in aad ilka caddeyn muujisid iyo in aad xiiso u qabto shaqada. Ha ka soo daahin balantii laguu qabtay in wareeysi lagula yeesho, ku imow ama waxyar ka soo hormar. Soo xiro dhar nadiif ah oo ku haboon marxaladaas. Markii aad timaadid xafiiska wareeysiga shaqada laguugula yeelanayo, waxaa laga yaabaa in aad welwelsan tahay ama cabsi kugu jirto isku day in aad is dejiso waayo qofku ha ahaado qof wax badan joogay

dalka Mareykanka ama wax yar ha joogee waa welwelaa markii su'aalo la weeydiinaayo ama shaqo uu raadsanayo. Ha qalbi jebin haddii aadan helin shaqadii ugu horeysay ee wareeysiga lagula yeeshay, waxaana laga yaabaa in aad wareeysiyo badan oo shaqo aad marto inta aadan shaqo helin. Waxaad ogaataa in ay caadi tahay dalka Mareykanka in aad wax badan raadiso shaqo, wareysiyo badanna lagula yeesho.

Waxaa laga yaabaa in shaqaalaha hay'adda dib-u-dejinta qaxootiga ay kula raadiyaan shaqada ugu horeysa. Shaqaalaha hay'adda dib-u-dejinta khibrad bay u leyihiin sidii ay qaxootiga ugu heli lahaayeen shaqo, waxeyna horey u caawiyeen qaxootigii kaa soo horeyay ee yimid dalka Mareykanka. Isku day in aad fikradahaaga u sharaxdo, lakiin maqal talooyinka ay ku siiyaan, waxay isku dayayaan in ay si cad kuugu soo gudbiyaan shaqooyinka aad ka filayso in aad ka hesho dalka Maraykanka marka la fiiriyo xirfadahaaga iyo khibradahaaga.

Waxaa kaloo jira xafiisyada shaqaaleynta dadweynaha (dowladda) oo kula raadinayo shaqo, wax kharash ahna kaaga baahnayn. Hay'addaada dib-u-dejinta ayaa kuu sheegi doonta meesha xafiisyadaan ay ku yaalaan.



Waxaad kaloo warbixinta shaqooyinka banaan ka heli kartaa inta badan joornaalada dalka ka soo baxa waxay leeyihiin qaybta wax lagu xayeeysiiyo (iidheh) oo loo yaqaano (caawin loo bahan yahay «HELP WANTED» ama «EMPLOYMENT»), qaybtaasoo lagu soo qoro wax shaqooyin ah ee banaan.

Saxiibadaa, qaraabadaadda ama qof kale oo qaxooti ah oo kaaga soo horeeyay dalka ayaa aad kaaga caawin sidii aad ku heli lahayd warbixin ku saabsan shaqooyinka meelaha ay ka furan yihiin, weydii haddii ay ka banaan yihiin shaqooyin meelaha ay ka shaqeeyaan. Waxaad kaloo warbixinta shaqooyinka banaan ka heli kartaa inta badan joornaalada dalka ka soo baxa waxay leeyihiin qaybta wax lagu xayeeysiiyo (iidheh) oo loo yaqaano (caawin loo bahan yahay «HELP WANTED» ama «EMPLOYMENT»), qaybtaasoo lagu soo qoro wax shaqooyin ah ee banaan.

BEST COPY AVAILABLE



Waxaa lagaa doonayaa in aad tusto qofka aad u shaqeynaysid cadeyn in laguu ogol yahay in aad dalka ka shaqeysan karto. Qaxootiga inta badan waxay isticmalaan waraaqdooda (I-94) taasoo hay'adda socdaalka iyo dhalasho siintu ay ugu dhufato shaabad tusaysa in aad dalka si sharci ah uga shaqeysan karto, waxaa kaloo lagaa rabaa warqada badbaadada bulshada (Social Security card), iyo waraaq aqoonsi oo sawirkaaga ku yaalo, sida basaboor ama shatiga wadidda baabuurka. Haddaba waxaa waajib ah in aad qaadato waraaqahaan rasmiga ah (dukomeentiga) iyagoo aan daabacaad ahayn (asal ah), meesha lagaaga qaadayo warbixinta shaqada, lama ogola in aad keento waraaqaha oo la soo sawiro.



Xafiisyo madax banaan oo dadka shaqo la raadiya ayaa ayagana dalka ka jira, waxay qaataan lacag badan, marka inta aadan saxiixin heshiiska isku day in aad fahanto waxa ay kuu qabanayaan iyo waxa ay kaa doonayaan. Haddii aadan fahmin, waxa ku qoran, waydiiso caawin hay'addaada dib-u-dejinta.

Xarunta Daryeelka Caruurta

Qoysaska Mareykanka inta badan aabaha iyo hooyaduba waxay shaqeeyaan waqti buuxa maalintii, taasina macnaheeda waxaa weeye in ay geeyaan caruurtooda xaruumaha daryeelka caruurta (xanaanada caruurta) maalintii oo dhan caruurta iskuulka gaartey waxaa lageeyaa iskuulka ka hor ama kadib. Iskuulaadka qaarkood waxay leeyihiin xanaanada caruurta oo masuul ka yihiin maamulka iskuulka ama hay'addo madaxbanaan, laakiin waalidku waxay bixiyaan kharashkii. Dad madax banaan ayaa jira oo ku sameeya xanaanada caruurta guryahooda ama xaafadoodda. Hay'addaada ayaa kaa siin karta wixii talooyin ah ee ku saabsan xanaanada caruurta ee mujtamaca aad ku dhex nooshahay.

Noocyadda Shaqooyinka

Shaqooyinka dalka Mareykanka waxay u qaybsamaan seddex qaybood oo u baahan heerar kala duwan oo khibrad iyo tababar ah:

Shaqooyinka bilowga ah ee lagu galo (shaqooyinka aan xirfadda u baahneyn) «unskilled jobs» shaqooyinkaan waxay u baahan yihiin tababar ama khibrad aad u yar, sida dadka hoteelada ka shaqeeya ama nadiifiya, makhaayad ama dadka warshadaha ka shaqeeya,

dadkaasi caadi haan waxay ku shaqeeyaan qiimo go'an saacadii. Shaqooyinkaan uma baahna in aad taqaano Ingriisi badan. qaxooti tiro badan ayaanna ka shaqeeya shaqooyinkaan inta ay ka baranayaan luuqadda iyo xirfado kale oo ay shaqooyin kale ku qabsanayaan.

Shaqooyinka Muruqmaalka ah ee xirfad u baahan «skilled jobs» shaqooyinkaan caadiyan waxay u baahan yihiin tababar rasmi ah, in aad u leedahay aqoon fiican luuqada Ingiriiska iyo xirfadaada oo aad soo banaan dhigtid. Guud ahaan shaqooyinka xirfadlaha ah waxaa lagu qataa lacag ka badan kan xirfadlaawaha ah. Inta aan lagu shaqaalayn ayaa lagaa doonayaa in aad muujiso xirfadda aad taqaano si shaqo laguu siiyo.
Shaqooyinkaan waxaa ka mid ah, makaaniga (farsamo yaqaanka) baabuurta, Korka dadka qurxiya (burukiyeer), Koronto yaqaan, ama farsama yaqaanka Kombiyuuterka. Guud ahaan shaqooyinkan waxaa lagu qaataa qiimo go'an saacadii ama mushaar go'an asbuucii. Lacagta ay qaataan dadka xirfada leh way ka badan tahay mida ay

qaataan dadka qabta shaqooyinka xirfadlaaweyaasha, xataa waxaa suurtagal ah in dadkaan ay ka lacag badan yihiin qaar ka mid ah dadka Jaamacadaha ka soo baxa shaqooyinka ay qabtaan. Inta badan shaqooyinkaan xirfadlaha, waxay u baahanyihiin shati ama in aad xubin ka tahay ururka shaqaalaha, shatiyada aad kala timid dalkaaga waxaa suurta gal ah in aan lagaa aqbalin ee aad u baahan tahay in aad hesho mid cusub.

Shaqooyinka takhasuska leh «professional jobs», shaqooyinkaan waxay u baahan yihiin in aad haysato shahaaddo jaamacadeed, Ingiriis aad u sareeyo iyo xirfaddo gaar ah ee ku saabsan waxa aad shahaadadda ka haysato. Shaqooyinkaan waqti dheer ayay qaataan sidii lagu heli lahaa, waxaana macquul ah in lagugu celceliyo tababar aad ku soo qaadatay dalkaagii, sida takhtarka daaweeya dadka iyo takhtarka ilkaha waxay u baahan yihiin in aad leedahay shati ama shahaaddo aad ka qaadato gobolka aad ka shaqeyneysid ee dalka Mareykanka. Xataa haddii aad horay u lahayd shati iyo shahaaddo aad dalkaagga kaga shaqeeysan jirtay waxaa kaloo lagaa doonayaa in aad imtixaan shahaaddadaada dib loogu qiimeeynaayo aad gasho inta aan laguu ogolaan in aad ku shaqeeysato cilmigaagga waddanka gudihiisa. Shaqooyinkaan inta badan waxaa lagu qaataa mushaar go'an oo lagu siiyo toddobaadkii ama bishii, mana aha mid loo xisaabiyo saacad saacad.

Haddaba markii aad isu diyaarineyso in aad hesho shaqo waqti yar ama waqti dheer aad ka shaqeyso maskaxda waa in aad ku haysaa in aad qabatid shaqooyin badan oo kala duwan si aad u gaarto hamigaagga oo aad u hesho

shaqo aad ku faraxsantahay. Waxaa laga yaabaa in dalkaaggii uu ka duwan yahay oo hal shaqo oo kaliya lagu ekaan jiray, laakiin dadka Mareykanka ah shaqooyinka aad bey u beddeshaan waxaana suurtagal ah inta sano ee ay shaqeeynayeen in ay seddax ama afar jeer iska beddelaan shaqooyinka.

Mushaar, Canshuur iyo waxyaalo kale oo lagaa jarayo, iyo Faa'iidooyin

Waxaa jira sharciyo u gaar ah mushaar bixinta ee dowladda dhexe iyo dowladda gobolka, taasoo khuseysa shaqo kasta. Inta aadan aqbalin shaqada lagu siiyo, ogow mushaarka lagu siinaayo waxa uu yahay. Haddii aadan fahmin waa waajib in aad su'aalo weeydiiso. Waxaad kaloo weydiisaa haddii ay jiraan waxyaalo kale oo faa'iidooyin ah marka laga reebo mushaarka. Markii lagu shaqaaleeyo, waxaa lagaa doonaayaa in aad buuxiso waraaq (dukomeenti) lagu wargelinaayo maaliyadda ku soo gasha hay'ddaha u qaabilsan canshuurta dowladda (IRS).

Jeeggaga mushaarka waxaa lagu siinayaa markii uu dhamaado waqtigii heshiisku ahaa, waxay noqon kartaa toddobaadkii mar, labadii toddobaadba mar, ama bishii hal mar. Shirkaddaha yar yar qaarkood waxaa laga yaabaa in ay bixiyaan lacag caddaan ah, laakiin mar kasta waxaad heleeysaa warqad lacag bixinta oo ay ku qoranyihiin saacaddihii aad shaqeeysay lacagtii aad shaqeeysatay oo aan waxba laga jarin inta kuu soo hartay ee aad qaadaneeysid, iyo wixii lagaa jaray. Jeegga ugu horeeya wuxuu noqon karaa mid qofka shaqaalaha ah ee cusub aad ugu wareero ee uu fahmi waayo waxa la siiyey iyo waxa laga goostay, sidaa daraadeed weydiiso saaxiibadaa, qaraabadaada ama hay'addaada dib-u-dejinta in ay kuu sharxaan jeegga iyo waxa ku qoran. Waa lagama maarmaan in aad hubsato waxa lagu siiyay iyo inta lagaa jarayba in ay sāx yihiin.

Mushaarka guud ee aad shaqeeysatay (Gross Pay). Waa wadarta guud ee lacagtii aad shaqeeysatay intii aan waxba lagaa jarin. Mar kasta waxaad fiirisaa waraaqda

BEST COPY AVAILABLE

lacag bixinta in lacagtaada guud ay la mid tahay mushaarka lagugu qaatay oo aad ku dhufato saacadaha aad shaqeeysay.

Canshuur jarid (Deductions). Waa lacagta laga jaro mushaarkaagga guud ee aad shaqeeysato. Sharciga dalka ayaa dhigaya in dadka shaqeysta lacag laga jaro, lacagtaa la jarayo waxaa kamid ah canshuurta dawladda dhexe, canshuurta badbaaddada bulshadda, canshuurta daryeelka caafimaadka, iyo goboladda intooda badan oo jarta canshuurta gobolka. Intaas waxaa raacsiisan in lagaa jaro lacag dheeraad ah sida caymiska caafimaadka iyo nolosha, shaqooyinka ururka shaqaalaha «union dues» ama lacagta shirkaddu kuu keeydiso si aad u isticmaasho marka aad gabowdo.

Lacagta kuu soo harta ee mushaarkaaga ah (Net pay) waa lacagta aad mushaar ahaan u qaadato markii laga jaro canshuuraha iyo wixii kaloo kugu wajibey in lagaa jaro.

Faa'iidooyinka waxaa ku siineysa shirkadda aad u shaqeysid ama dowladda ayaa kuu soo celineysa lacagihii canshuuraha lagaaga jaray qaar ka mid ah.

Caymiska caafimaadka waa faa'iido aad ka helayso shirkadda aad u shaqeyso, waxaa suurto gal ah in shirkaddu kaa wada bixiso caafimaadka ama aad bixiso qayb, qaybta kalena shirkaddu kaa bixiso. Shirkaddaha qaarkood waxay caymiska caafimaadka dadka siiyaan markii aad shaqayso waqti go'an, seddex bilood ilaa iyo lix bilood. Inta badan waa laguu ogol yahay in aad qoyskaaga ku darsato haddii aad bixiso lacag dheeraad

ah inkastoo shirkaddaha qaarkood aysan bixin caymiska caafimaadka, inta badan way bixiyaan. Is daaweynta ama caafimaadka dalka Mareykanka aad buu qaali u yahay, sidaas daraadeed way fiican tahay in aad sameysato ama ka fekerto in aad gasho caymis caafimaad.

Faa'iidooyinka kale ee laga yaabo in aad ka hesho shirkadda aad u shaqeyso waxaa ka mid ah: **fasax jirro darteed la isu siiyo, fasax (shaqo ka nasasho lacag kuu socoto)**, iyo **hawlgabka faa'iidadiisa**. Shirkaddaha dalka ee loo shaqeeyo waxay leeyihiin qorshooyin hawleed oo kala duwan, waxaa wanaagsan in aad wax ka barato shirkadda aad la shaqeeyso markii lagu shaqaaleeyo. Marmarka qaarkood faa'iiddooyinka aad helayso waxay ku xiran yihiin waqtiga aad ka shaqaynaysay inta uu le'eg yahay, tusaale ahaan, shaqaalaha ka shaqeeya shirkaddaha wax badan waxay helaan fasax ka badan kan cusub ee shaqada bilaabey. Haddaba waa muhiim in aad su'aalo weydiiso shirkaddaada xafiiska shaqaaleynta, hay'addaada dib-u-dejinta shaqaalaheeda, saaxiibaddaa, qofka wakiilka kaa ah ama qof kale oo kaa caawin kara in aad hesho warbixin ku saabsan faa'iidooyinka laga helo shaqooyinka.

Saddex Faa'iido oo Kale oo laga helo shaqada:

Badbaaddada shaqaalaha «Social Security» waa barnaamij ay dowladda dhexe ku caymineyso dadka markey gaboobaan oo howl gabaan. Kharashka waxaa qaybsada loo shaqeeyaha iyo shaqeeyaha. Faa'iidada badbaadada bulshada waxay ku xiran tahay taariikhdaadii mushaarka ee aad qaadan jirtey mudadii aad shaqeysay ee dowladda Mareykanku kaa heyso.

Faa'iidadaan waxaa la siiyaa shaqaalaha joogtadda u bixiya canshuur ahaan intii ay shaqeynayeen.

Caymiska dadka aan shaqeysan «Unemployment insurance» waxaa la siiyaa qofkii shaqadiisa ku waayey marxalado ka baxsan awoodiisa. Waxay ka timaadaa canshuurihii ay bixin jireen shirkaddii uu qofku u shaqeyn jiray.

Magdhowga Shaqaalaha waxaa la siiyaa shaqaalaha ku dhaawacma shaqada gudaheedda, mushaarka qaarkii iyo caymis caafimaad oo ay isku daaweeyaan marka ay u baahdaan. Goboladda dalka badidoob way qabaan magdhowgaan.

Xuquuqdda Shaqaalaha

Qaxootigu wuxuu dalka Mareykanka ku leeyahay xuquuq shaqaale oo la mid ah midda uu leeyahay qofka Mareykanka ah. Qofka loo shaqeeyo lagama yaabo in uu kala eexasho kugu sameeyo sababtoo ah in aad heysato sharci qaxootiyadeed ama sida, da'da, midabka, curyaanimo, ama indha la' ama dhego la', xaas ahaan, dhalashadaada, qoladaada, diintaada iyo jinsigaaga (lab ama dhedig). Hase yeeshee, waxaa jira shaqooyin u furan dadka Mareykanka ah oo kaliya, sida shaqooyinka dowladda. Inta badan sharciga shaqaalaha u degsan wuxuu ka ilaaliyaa shaqaalaha meelaha khatarta gelinaya naftooda ee laga shaqeeyo, iyo shukaansi ama ficilo aan raali leysaga aheyn ee meesha shaqada lagu sameeyo «sexual harassment».

Shaqadda iyo Shaqeenta: Talooyin howsha kuu sahla

Hay'addaha dib-u-dejinta iyo qaxootiga badankiisa waxay ogaadaan waxyaabo badan oo laga rabo in ay maskaxda ku heyaan markii ay shaqo ka bilaabayaan dalka Mareykanka, kuwaasoo kaa caawinaya sidii aad ku xagsan laheyd shaqaddaaada iyo sidii aad horumar uga gaari laheyd ama u heli laheyd shaqo fiican mustaqbalka, waxaa ka mid ah:

Dhowr waqtiga shaqada. Wakhtiga shaqada oo aad ku timaado dalka Mareykanka aad baa looga qiimeeyaa, qofka loo shaqeeyana fikrad fiican ayuu kaa qaadanayaa haddii aad ku timaado wakhtiga. Haddii aad ka soo daahdo shaqada waxaa laga yaabaa in laga jaro mushaarkaaga wakhtigii aad ka soo daahday. Shaqada ka qaado fasax haddii aad jiran tahay oo kaliya. Dadka Mareykanka ah intooda badan haddii ay jirooyin yaryar qabaan sida hargabka oo kale way iska aadaan shaqooyinkooda, sharaf bayna u tahay in aysan maalina shaqada ka baaqan. Markasta telefoon u dir oo ogeysii horjoogahaaga, hadii aad ka soo daahayso shaqadda ama aadan imaaneyn si kastaba ha noqotee.

Saxiibtinimo u muuji horjoogahaaga iyo shaqaalaha aad isla shaqeeysaan. Saacadda qadada iyo biririfta (bareegga) ayaa ah waqti aad dhexgali karto lana sheekaysan karto shaqaalaha aad isla shaqeeysaan; waxyaalaha caadiga ah ee laga wada sheekaysto dalka Mareykanka waxaa ka mid ah, cimiladda, toddobaadka

(asbuuca) dhamaadkiisa (Sabtida iyo Axada) waxa socda, cuntada iyo ciyaaraha, xitaa waxaad heli doontaa waqtiyo badan oo aad kala sheekaysato dhaqankaaga, siiba waqtiyada feestooyinka dhaqanka aad u leedihiin sida aad u feesteeysaan.

Wax soo saar waa in aad leedahay. Waad la sheekeeysan kartaa saaxiibtinimana u muujin kartaa shaqaalaha aad isla shaqeeysaan laakiin waqti badan ha ku lumin in aad hadasho. Su'aalo weydii haddii aadan fahmin wax ku saabsan shaqada, ka fogoowna in aad ka hadasho arrimaha khuseeya dadka kale shakhsiyaadkooda, iskana ilaali in aad wacdo taleefano badan oo adiga kuu gooni ah waqtiga shaqada.

Su'aalo weeydii haddii aadan fahmin ama arrin shaki kaaga jiro, haka cabsan ama haka xishoon dadka aad isla shaqeeysaan ama horjoogahaaga ee weydii su'aalo iyo sida loo qabto waxaadan aqoon. Saa hadaad yeesho waxaad qaban doontaa shaqo fiican, qofka aad u shaqeeysana xushmad ayuu ku siinayaa.

La imoow dadaal dheeraad ah si aad u barato howlo cusub una qaaddo mas'uuliyad, ama shaqadood horumar ka gaarto waxay ka bilaabataa sida aad u soo bandhigto kartidaada iyo rabitaankaaga taasoo ku gaarsiineysa in aad qaaddo mas'uuliyad dheeraad ah.

Shaqooyinka waad beddelan kartaa adigoo ka qaadanaya shaqo cusub ama ka fiican tan hore shirkado kala duwan. Mar kasta qofka aad u shaqeeysid waa in aad u sii sheegtaa ugu yaraan laba toddobaad ka hor. Weligaa shaqo haka tegin adoon mid kale heeysan iskuna day in aad ka shaqeeyso shaqadaada ugu horeeysa ugu yaraan lix bilood si aad u hesho taariikh shaqo ee wanaagsan ee aad ku leedahay shirkadda.



70

Dalka Mareykanka, waxbarashada qof kasta ayay u furantahay ayadoon loo fiirinayn qofka da'diisa, midabkiisa (dhalashadiisa), diintiisa ama dabaqada bulshada. Waxbarashada dadweynaha waa mid bilaash ah oo aan wax lacag ah lagaa rabin, waana mid khasab ku ah xag sharci in caruurta da'doodu u dhaxayso 6 sano ilaa 16 sano jir, degmooyinka qaarkoodna waxay qabaan nidaam carruurta ka weyn 16 sano kana yar 6 sano sharciyo ku adkeeynaya in ay iskuul galaan. Waalidku haddii ay rabaan waxay caruurtooda geeysan karaan iskuulaad madax banaan oo la xiriira diimo laakiin waxaad ogaataa in ay aad qaali u yihiin lacagta lagu bixiyo waxbarashadaas. Waxbarashada wixii dugsi sare ka sareeya ma aha bilaash (lacag la'aan) waxaana laga yaabaa in ay aad qaali u tahay.

Dadka Mareykanka intiisa badan waxay u arkaan in waxbarashadu ay tahay dariiqa ay ku gaari karaan shaqooyin badan oo ay ku qanacsan yihiin, horumarna kaga gaari karaan habka ay u noolyihiin. Dadku markii ay go'aansadaan in ay sii wadaan waxbarashadooda iskama dhaafaan shaqooyinka ee waxay shaqeeyaan maalintii shaqo buuxda (full time) habeenkii iyo maalmaha toddobaadkiisa ee fasaxa ah (sabtiga iyo axada) ayey aadaan daruusta in ay ka soo dhigtaan iskuulaadka.

Waxbarashada Caruurta ee Iskuulaadka Dowladda

Dalka Mareykanka iskuulada dowladda waxaa isla wada dhigta oo isku dhex jira isku galaasna fariista, banaankana iskula ciyaara caruur midabkooda, diintooda iyo dhaqaalahoodu kala duwan yahay. Caruurta curyamiinta ah iyo kuwa maskaxda wax ka

qaba waa khasab in ay iskuul dhigtaan. Caruurta dhibaatooyinkaan aan soo sheegnay qaba iskuulka ayaa u habeeya barnaamij iyagoo kala tashanaya waalidka.

Waa in caruurta iskuul la geeyo markii aad timaado dalka Mareykanka sida ugu dhaqsaha badan. Hay'addada dib-u-dejinta ayaa kaa caawinaysa sidii aad caruurtaada iskuul ugu heli laheyd. Iskuulaadka inta badan waxay kaa doonayaan in uu cunuggu talaalan yahay lana soo raajeeyo iyo taariikhdiisa caafimaadka. Inkastoo iskuulaadka dowladdu lacag la'aan yihiin (bilaash), haddana waxaa jirta waxyaalo yaryar oo waalidku mas'uul ka yahay inuu bixiyo ama u gado cunuggiisa sida: Qalin qoriga, waraaqaha ama buugta wax lagu qoro iyo waxyaalo kale oo wax lagu barto iyo lacag yar oo looga baahan yahay cunuggu in uu ka qayb qaato ciyaaraha iskuulka.

Guud ahaan waxaa dalka Mareykanka ka jira seddex heer oo waxbarashada caruurta ah.

Iskuulka hoose; wuxuu ka bilowdaa dugsigga barbaarinta caruurta yaryar ee da'doodu tahay shan sano

jir ilaa intuu ka dhameeysanayo galaaska shanaad ama lixaad.

Dugsiga dhexe; caadiyan waa galaasyada lixaad ilaa sideedaad. Heerka saddexaad ee iskuulka cruurta waa **Dugsiga sare** oo caadiyan lagu dhigto galaasyada sagaalaad ilaa iyo laba tobonaad, kaasoo ah galaaskii ugu danbeeyey. Ardayda ku dhameysa dugsiga sare si guul ah waxaa la siiyaa shahaadada dugsiga sare. Guud ahaan ardayda cusub ee dalka soo gala waxaa fasalada lagu geeyaa iyadoo la fiirinnayo da'ddooda iyo inta sanno oo ay iskuul soo dhigteen. Caruurta yaryar ee Ingiriiskoodu aad u yar yahay waxaa la geeyaa oo looga bilaabaa fasal hoose.

Sanad dugsiyeedku (fasaladu) waxay caadiyan bilaabmaan bisha Agoosto ama Sebtembar, waxayna dhamaadaan bisha Maajo ama Juunyo. Caruurta intooda badan waxay fasalada ku jiraan lix saacadood malintii, Isniinta ilaa iyo Jimcaha. Haddii iskuulku ka fog yahay gurigaaga cunuguna u lugayn karin, waxaa laga yaabaa baska (gaadiidka) iskuulka in lacag la'aan

lagu qaado cunuggaaga si uu iskuulka u yimaado. Caruurta cunto way u qaadan karaan iskuulka ama waxay qiima jaban ku gadan karaan cunto nafaqo leh oo lagu gado makhaayada iskuulka.

Waxaa lagama maarmaan ah in aad ogaato in ay aad muhiim u tahay in ay caruutu iskuulka yimaadaan oo aysan maalina ka baaqan. Haddii ardaygu gafo iskuulka maalin waalidka ayaa laga rabaa in ay soo qoraan waraaq sharaxaysa sababtuu u maqnaa, markaa kadibna waa in ardayga la siiyaa saacado dheeraad ah oo lagu buuxiyo maalintii uu maqnaa.

Iskuulada dalka Mareykanka wiilasha iyo gabdhuhu ma kala saarna fasal ayay wax ku wada bartaan. Waxbarashada dalka Mareykanka aad bay uga duwan tahay tan dalkaaga. Macalimiintu waxay ardadda ku dhirigaliyaan in ay wax ku bartaan fekir iyo falanqeyn baarisna sameeyaan waxa ay baranayaan oo aaney xafidin oo keliya. Ardayduna waxay ka qayb qataan wada hadalka ama, falanqaynta casharka, iyagoo

waydiinaya su'aalo xataa hadii aysan luuqada Igiriiska si fiican u aqoon.

Ma jiro manhaj (barnaamij) qarameed ee u degsan waxbarashada dalka Mareykanka oo dhan. Hase yeeshee gobol walba ama degmo kasta ayaa go'aansata duruusta lagu dhigaayo iskuulaadka. Guud ahaan ardayda oo dhan waxay bartaan luuqada Ingiriis, xisaab, saynis, cilmiga bulshada, jirdhiska. Farshaxanka, muusikada iyo luuqaddo ajnabi ah ayana waa lagu qaataa. Waxaa kaloo inta badan la socda dugsiyada sare ciyaaraha kubada oo noocyo badan leh iyo xarakaadyo kale ee la qaato waqtiga caadiga ah ee fasaladu socdaan ama kadib saacadaha iskuulka laga soo baxo.

Waxa ugu dhib badan ee caruurtu la kulanto waa sidii ay u baran lahaayeen luuqada Ingiriiska duruustana ugu baran lahaayeen, inkastoo ay si dhaqsi ah u bartaan. Iskuulaad badan ee dalka Mareykanku waxay qabaan fasalo loogu talagalay ardayda cusub ee timid dalka bartana luuqada Ingiriiska ee ah luuqadodda labaad (ESL). Iskuulaadka qaarkood waxay ardayda ku cusub dalka ku caawiyaan macalimiin gaar ah oo saacado go'an wax bara. Inta badan ardayda qaxootiga ah waxay la kulmaan dhibaatooyin sidii ay ula qabsan lahaayeen sannadka ugu horeeya ee ay bilaabaan iskuulka, caruurtu waxay dareemaan cidlo (saaxiib la'aan), laakiin markii luuqadoodu fiicnaato waxay dhakhsadiiba samaystaan saaxiibo, iskuulkana way jeclaadaan.

Arday badan iyo waalidkoodba waxaa yaab ku noqota sida ay ardaydu u labisan yihiin oo aan laheyn dhar u gooni ah, ahna mid iska caadi ah oo aan nidaam iyo sharci toona lagu dabakhan, meeshii dalkooda la xiran

jiray dhar u gooni ah iskuulka. Iskuulaadka dowladda waxay caruurta siiyaan madax banaani ay ku doortaan waxay rabaan, laakiin waxaa laga doonayaa ama filayaa in ay adeecaan qaanuunyadda u yaala iskuulka. Haddii ardaydu ay jabiyaan qaanuunyadda u degsan iskuulka, waxaa laga yaabaa in lagu ciqaabo in uu soo sameyo shaqo guri oo kabadan tan ardayda kale ee galaaskiisa ah samaynayso ama in iskuulka lagu hayo kadib marka ardayda kale la sii daayo, ama loo diido in uu ka qayb qaato ciyaaraha isboortiga, ama waxaa laga cayriyaa iskuulka maalmo. Dalka Mareykanka jirdilku waa ka mamnuuc oo qofka korkiisa waxba laguma dhufan karo.

Iskuulaadka waaweyn qaarkood ee ku yaala magaalooyinka waaweyn waxay qabaan dhibaatooyin kaga timaada kooxo yar yar oo burcad ah oo u dagaalamayo qabiil ama midab ama jinsiyado kala duwan. Meelaha qaarkood waxa ka dhaca in ardaygu la yimaadaan iskuulaadka daroogo iyo hub. Haddii ardayda la soo hajuumo ama la jahawareeriyo, ha u soo dacwoodaan macalinkooda ama diritoorka iskuulka iyagoon wax dagaal ah sameyn.

Waalidiinta ama dadka masuulka ka ah caruurta waxaa laga doonayaa in ay kaalin muhiim ah ka qaataan ardayga waxbarashadiisa, waxana lagu dhiirigelineyaa in ay yimaadaan iskuulka oo ay bartaan macallimiinta waxbarta caruurtooda iyo in ay ka soo qeyb galaan shirarka iskuulka xataa haddii aysan aqoon Ingiriis fiican. Iskuulada intooda badan waxay siiyaan warbixin walidiinta luuqadooda xadidantahay, islamarkaasna ka caawiya sidii ay u fahmi lahaayeen waxbarashada caruurtooda.

Waxbarashadda Dadka Waaweyn

Dadka Mareykanka intooda badan waxay u arkaan waxbarashadu in ay tahay wax inta aad nooshahay oo dhan socon kara, qaarkoodna waxay isku qoraan oo bilaabaan iskuul ayagoo dad waaweyn ah. Dadka qaar yar ayaa awood dhaqaale u leh in ay shaqo iska dhafaan oo iskuul keliya dhigtaan waqtigooda oo dhan. Sidaas darteed Mareykanka intooda badan gelina way shaqeeyaan galina waxbay bartaan.

Dadka cusub ee dalka ku soo biira waxaa laga filayaa in ay shaqaystaan, waxna bartaan. Dadka qaxootiga intooda badan waxay bilaabaan barashada luuqada Ingiriiska; qaarkoodna waxay galaan tababaro ku saabsan shaqooyinka ay rabaan, inkastoo waxbarashada farsamadda iyo tan takhasuskuba ay u baahan yihiin Ingiriis fiican. Markii aad si fiican u degto, way kuu sahlantahay in aad ka barato bulshada dhexdeeda meelaha laga helo waxbarashada. Waxaa suurta gal ah in aadan helin sanadka ugu horeeya ee dalka Mareykanka aad timaado waxbarasho jaamacadeed. Haddiise aad

waqti badan joogtid waxaa suurtagal ah in aad hesho waxbarashadaadii jaamacadda ama takhasuskii aad rabtay in aad samayso. Way wanaagsan tahay qoyska in ay isla kaashadaan sidii ay u caawin lahaayeen in ay wax ka bixiyaan waxbarashada dadka waaweyn ee qoyska dhexdiisa.

Luuqaddaada Labaad ee Ingiriiska (ESL)

Bulshada intooda badani waxay leeyihiin meelo ay ku bartaan luuqadda Ingiriiska, taasoo ka mid ah waxbarashada dadka waaweyn. Fasaladaan waa loo ogol yahay in qof kasta ka soo qaybgalo. Waxaana isku fasal fariista amaba wax ku wada bartaa rag iyo dumar da' kala duwan, waxbarasho kala duwan iyo jinsiyado kala duwan leh. Duruusta lagu qaato fasaladaan waa casharo la xiriira xiriirka bulshada iyo goobta shaqadda. Fasaladda bilowga ah waxaa lagu bartaa Ingiriiska lagu hadlo si qofku u qabsado waxyaalaha noloshu u baahan tahay iyo sidii uu isku filaansho u gaari lahaa. Fasaladda dhexe iyo kuwa sare waxaa lagu bartaa casharro ay ka mid yihiin naxwaha af Ingiriiska sida loo akhriyo iyo sida loo qoro luuqada Ingiriiska.

Habka kale ee lagu barto luuqadda Ingiriiska waa adigoo hela qof kuu gooni ah oo aan wax lacag ah kaa qaadanayn, qofkaas waxaad kaloo ka baranaysaa dhaqanka iyo caadooyinka Mareykanka. Waxaad ka heleysaa warbixinta ku saabsan sidii aad u heli lahayd dadka diyaarka u ah in ay luuqadda ku baraan si tabaruc, xarumaha waxbarashadda dadka waaweyn iyo hay'addaada dib-u-dejinta. Waxaa kaloo jira iskuulo ganacsi ah oo lagu barto luuqadda Ingiriiska oo aad qaali u ah.

Waxbarashada dadka waaweyn waxaa lagu qaataa casharo kale oo la socda luuqada Ingiriiska, waxaa ka mid ah maamulka xisaabaadka, luuqado ajnabi, sida loo isticmaalo kombiyuutarka. Casharadaan inta badan looguma tala gelin dadka luuqadoodu hoosayso. Horumarinta Guud ee Waxbarashada (GED) waxay ka caawisaa dadka waaweyn markii ay dhameystaan in ay helaan shahaadada dugsiga sare. Waxaa kaloo jira fasalo kale oo kaa caawiya isku diyaarinta sidii aad ku qaadan lahayd dhalashada dalka Mareykanka. Dadka qaxootiga ah waa in ay bixiyaan lacag la mid ah lacagta ay ka

"Siddaasaan ku bartey. Waxaan iri luuqadda Ingiriiska ayaan ka dhiganayaa furaha. Haddii albaabka guriga laga galo kaa xiran yahay, ma gali kartid fure la'aan. Si aad u fahanto si wax loo sameeyo dalkaan, waa in aad luuqadda Ingiriiska haysataa. Ingiriisku waa furaha lagu furo albaabka Ameerika."

bixiyaan dadka meesha degan waxbarashada dadka waaweyn.

Tacliinta Sare iyo Tababaro kale

Iskuuladka tababarada iyo farsamadda waxay dadka u tababaraan shaqooyin gooni ah sida, Makaanikada baabuurta, qotka ku shaqeeya barnaamijka kumbiyuutarku ku shaqeeyo, kalkaaliyeyaasha caafimaadka iyo kan dhaqtarka ilkaha kalkaaliyaha u ah. Caadiyan barnaamijyadaan waxay u baahan in aad luuqada Ingiriiska si fiican aad u taqaano iyo in aad iska bixin karto lacagta waxbarashada.

Waxaa ka jira dalka Mareykanka laba nooc oo waxbarasha sare ah sida, Kuliyaddaha tacliinta sare (xirfadda) iyo Jaamacaddaha. Kuliyadduhu waxay bixiyaan laba sanno oo waxbarsho ah oo ardayga lagu barayo xirfad khaas ah sida koronto yaqaan, kalkaaliye caafimaad. Markii ay dhameystaan labadan sano waxey ardadu helayaan Shati (license) ama waxay u bedelan karaan Jaamacad oo ay dhiganayaan laba sano oo kale si

ay u dhamaystiraan barnaamijka Jaamacadda oo afar sanno ah. Ardada kuliyaddaha (xirfada) waxaa laga doonayaa in ay guud ahaan dhamaystiraan manhaj (barnaamij) loogu tala galay inta aysan galin wixii ay ku takhasusi lahaayeen sida, fiisigiska, xisaabta, taariikhda ama diyaarinta cilmiga sharciyada iyo caafimaadka. Machadyaddaan waxay u baahan yihiin ardaygu in uu yaqaano Ingiriis aad u sareeya, ardada aan luuqadooda hooyo Ingiriis ahayn waxaa laga rabbaa in ay ku gudbaan imtixaanka inta aan lagu qorin Machadka. Waxbarashada sare ee dalka Mareykanka aad bay qaali u tahay, laakiin inta badan Machadyada ama Jaamacadduhu waxay qabaan xafiisyo u qaabilsan deeqda waxbarashada oo aad ka ogaan kartid warbixin ku saabsan deeq waxbarasho ama daynta loo ogol yahay inuu ku dhamaysto waxbarashadiisa.

Dadka haysta shahaadooyinka sare ee jaamacaddaha dalkooda sida caafimaadka ama Injineernimada, waxaa laga yaabaa in dib loogu celiyo fasalo iyo imtixaano kale inta aan laguu ogolaan in aad ku shaqaysato xirfadaada. Hawshaan waxay noqon kartaa mid aad qaali u ah wakhti dheerna qaadata, tasoo u baahan in lacadeeyo waxbarashada iyo aqoonta uu u leeyahay takhasuskiisa uu kala yimid dalkiisa iyo buundada imtixanka luuqada Ingiriiska. Haddaba qaxootiga raba in ay shaqooyinkoodii dib u helaan oo ay takhasuska u haystaan, waxay ku bilaabaan shaqooyin ka hooseeya takhasuskooda inta ay ka heleyaan shahaadadda dalkaan. Tusaale ahaan Dhakhtarku wuxuu ku shaqayn karaa kaaliye shaybaar inta uu ka helaayo aqoonsigiisa.

HEALTH DEPARTMENT

EMERGENCY
Georgetown University
Medical Center
Entrance 2




THE AMERICAN UNIVERSITY
HEALTH INSURANCE CLAIM FORM

82

Gargaarka caafimaadka dalka Mareykanka dhexdiisa way badan yihiin, waxayna qabtaan adeegyo kala duwan. Aad bay muhiim u tahay in aad weydiiso hay'adda dib-u-dejinta warbixin ku saabsan gargaarka caafimaadka ee bulshaddaada dhexdiisa.

Marka ugu horeya oo aad timaado dalka Mareykanka, adiga iyo qoyskaaga waa la idin la soo xiriireyaa si la idin kugu diyaariyo **ka hortagga cudurada fafa**. Ujeedada baaristuna waxay tahay in la caddeeyo iyo in laga hortago lana daaweeyo dhibaata kasta ee caafimaad daro ah, taasoo ay kuu diyaarisay hay'addaada dib-u-dejinta si loo sugo awooddaada shaqo ama waxbarasho. Baaristu waa lacag la'aan, waxaana lagaaga qaadi doonaa xarumaha caafimaadka bulshada ama xaafisyada takhaatiirta.

Dalka Mareykanka, qof kasta wuxuu masuul ka yahay bixinta kharashka adeegyadda caafimaadka, dowladunna masuul kama aha. Qiimaha gargaarka caafimaadka waa sareyaa, sidaas daraadeed dadweynaha intooda badan waxay ku tiirsan yihiin caymiska, iyagoo u mara loo shaqeeyaha.

Caymiska caafimaadka waxaa lagu heli karaa iyadoo la bixiyo kharashka bil kasta. Loo shaqeeyeyaasha qaarkood waxay bixiyaan caymiska caafimaadka oo dhan, ama qeyb ka mid ah bilkasto. Badanaba waxaa jirta xili la sugo laga billaabo maallinta lagu shaqaaleyey ilaa iyo inta aad xaq u yeelaneysid caymiska caafimaadka. Way jirraan shirkaddo caymis oo fara badan oo leh barnaamishiyo kala duwan. Waxaa kaloo jira hay'adaha daryeelka caafimaadka (HMOs) oo la mid ah barnamijka caymiska. Iyadoo la adeegsanayo habkaan daryeelka caafimaadka waxaa bixiya koox dhaqaatiir ah oo madax banaan iyo bukaan socod eegtada (clinics). Qof kasta oo ka tirsan daryeelka caafimaadka (HMO) wuxuu leeyahay dhaqtar u qaabilsan oo u qabta gargaar assaasi ah iyo in uu siiyo ogolaansho booqasho kasta ee

uu ku tegayo meelaha laga bixiyo gargaarka degdega ah, isbitaalada ama dhaqtar u leh takhasus. Marxaladaha qaarkood, qiimaha daaweeynta caafimaadkaaga oo dhan waxaa bixinaya shirkadda caymiska, inkastoo marmarka qaarkood lagaa doonayo in aad bixiso qiimaha daaweynta qayb kamid ah.

Si loo caawiyo dadka dakhligoodu yaryahay, waxaa jira barnaamijyo doowladeed ee loogu talagalay in uu daboolo qarashka daaweeynta. Barnaamijkan doowladu ugu tala gashay daryeelka caafimaadka ee dadka danyarta ah, wuu is beddeli karaa. Weeydii shaqaalaha hay'adaha dib-u-dejinta si ay kaaga caawiyaan ayna kuu siiyaan warbixin sax ah ee ku saabsan adeegyada caafimaadka ee aad heli kartid.

Qaxootigu waxay xaq u leeyihiin in ay dalbadaan **Gargaarka caafimaadka qaxootiga (RMA)** ama **Daryeel caafimaad (Medicaid)** oo laga bixiyo xafiisyo u gaar ah dowladda dhexe (Federaalka), adoo ka helaya warbixinta dowladda hoose ee gobolka. Labada barnaamijba waxaa loogu tala galay in ay bixiyaan daryeelka caafimaadka dadka dakhligoodu uu hooseeyo. Codsadayaashu waa in ay buuxiyaan fomam taasoo u baahan caddeeyn dakhli iyo warbixin kaloo naftaada ah.

Bulshadu wey ku kala duwantahay adeegyada gargaarka caafimaadka. Badanaaba waxaa lagaa doonayaa in aad u sameeysato ballan inta aadan tegin dhakhtarka, dhakhtarka ilkaha iyo dhakhtarka madaxa. Waxaad u baahantahay in aad barato adeegyada caafimaadka ee laga heli karo bulshada dhexdooda qaar kamid ahna waxeey ku sharaxanyihiin hoos.

Waaxda Caafimaadka Dadweynaha—xafiisyada intooda badani waxeey bixiyaan talaal looga hortegayo cudurada iyo waxaa kaloo ay siiyaan ka hortaga adeegyada caafimaadka, sida baarista iyo daaweeynta qaaxada. Qaxootiga adeegyadaan waxaa loogu qabtaa lacag la'aan ama waxaa looga dhigaa raqiis. Waalidka waxaa wajib ku ah in ay kala xiriiraan waaxda caafimaadka dadweeynaha talaalka caruurtooda. Caruurta loo ogolaaday in ay dhigtaan iskuulka waa in ay soo diraan caddeeyn talaalada looga baahanyahay oo dhan.

Takhaatiirta Madaxa Banaan—caafimaadka ama bukaan socod eegtada—waxeey bixiyaan daryeel caafimaad guud ahaan iyo gaar ahaanba. Xafiiska takhaatiirtaas badanaaba wuxuu kaaga baahanyahay cadeeyn warbixinta caymiska marka aad ballanka sameysaneeysid. Takhaatiirta qaarkood waxeey u shaqeeyaan sida isbitaal yar oo madax banaan (private clinic) ama koox kaloo dhakhaatiir ah iyo dhakhaatiir takhasus ku leh cudurada qaarkood.

Xarunta caafimaadka ama bukaan socod eegtada—waxaa caawiya dowladda iyo hey'addo kaloo madax banaan. Xarumahaani way aqbalaan kaararka caymiska madaxa banaan iyo hay'adda daryeelka caafimaadka (Medicaid), waxay ka qaadaan lacag dadka aan ceynsaneyn.

Isbitaalada—hay'addaan caafimaadka waxaa laga helaa meello badan oo ay ku nool yihiin bulshada Mareykanka. Dhakhaatiirta ama bukaan socod eegtada waxay bukaanka heysta dhibaato gaar ah u diraan isbitaalka si loogu baaro iyo si loogu qalo. Isdaweeynta dalkaan waa qaali, sidaas daraadeed isbitaalada waxeey kaaga baahanyihiin caddeeynta caymiskaaga ama awoodda aad ku bixin kartid adeegaan.

Gargaarka degdegga ah—meelahaan waxay u fududeeyaan isbitaalada ama meelaha kaleba arrimaha degdega ah ee dhibaatooyinka khatarta ah ee caafimaadka. Badanaaba waa mashquul hase yeeshee uma baahna in aad balan ka sameeysato gargaarka degdega ah, laakiin waxaa suurtogal ah in aad wax badan sugto. Guud ahaan haddii ay jiraan jirooyin aan degdeg aheyn waa in aad wacdaa takhtarka oo ballan ka sameysataa. Isticmaal gargaarka degdega ah haddii lagama maarmaan ay tahay oo keliyah. Gargaarka degdega ah waa u furanyahay qof kasta, iyadoon loo fiirineyn qofku in uu ku jiro caymiska caafimaadka iyo in uu kharashka daweeynta iska bixin karo.

Adeegga ambalaaska—adeegani wuxuu ku siinayaa gargaar gaadiid iyo dawo marka ay jirto baahi degdeg ah, mana jirto hab kale oo lagu qaado qofka dhaawacmey ama jiran ee uu ku helo gargaar daawo oo degdeg ah. Ambalaaska lacagteeda waxaa lagugu soo dalacayaa marka adeegga aad u baahneyd laguu qabto kadib.

Daryeelka ilkaha—adeeggan waxa kuu qabanaya dhakhtarka ilkaha iyo xarumaha bukaan socod eegtada (clinics). Ma jiraan daryeelka ilkaha oo lacag la'aan ah ama rakhiis ah laakiin waxaa laga yaabaa in ay bixiyaan xarumaha caafimaadka ama bukaan socod eegtada. Caymisyadda caafimaadka oo dhan kuma wada daraan daryeelka ilkaha.

Daryeelka Caafimaadka Madaxa—Waxaa shaqadaan qabta takhaatiir madax banaan iyo takhaatiirta cilmi nafsiga iyo isbitaaladda bukaan socod eegtada. Waxaa kaloo laga yaabaa in aad ka hesho daryeelka ama daaweynta dadka maskaxda looga jira ururada leh wax wada qabsiga macaawinada iyo hay'addaha u adeegga qoyska. Hay'addaha dib-u-dejinta qaarkood waxay kaa siineyaan talooyin sidii aad u heli lahayd meelaha kale ee laga helo daryeelka dadka maskax looga jiro.

SALE

Mellon Bank
24 Hour Banking

Preferred
SHOPPER
AMERICAN EXPRESS

90

Dalka Mareykanka noloshiisu aad iyo aad bay qaali u tahay, qaxooti ahaana waxaad u baahan tahay in aad ka taxadirtid miisaaniyadaada sidii aad lacag u kaydsan lahayd iyo isticmaalka iyo wixii aad amaahsatey.

Qorsheynta Dakhligaagga

Waa wax daruuri ah in aad taqaano sida loo maamulo dakhligaaga markii aad qaadato lacag go'an oo la yaqaano. Caadiyan "kharajka aad si joogto" ah ugu baahan tahay waxaa ka mid ah:

Ijaar—Ijaarka waa kharajka ugu badan waana waxa ugu horeeya ee lagaa rabbo in aad qorshaha ku darto.

Korontada, Gaaska, Biyaha iyo qaadista qashinka—Kharshayadaan in ka mid ah waxaa laga yaabaa in ay ku jiraan guriga ijaarkiisa, laakiin waxaa laga yaabaa in aad si kala gooni ah u bixiso hal ama laba ka mid ah. Qiimaha qaboojiyaha iyo kululeeyaha waxay isla bedbedelaan xiliyadda.

Cuntada—Markii ay suurtogal kuu tahay cuntada ka soo gado dukaamadda waaweyn, iyagoo ay qiimaha aad uga jaban yihiin. Isbarbardhig alaabta si aad u hesho shirkad ku gado alaabteeda qiimo ka jaban tan kale.

Gaadiidka—Waa in aad xisaabisaa kharashka gadiidka ku geeya shaqadda kaana soo celiya maalin kasta, safarka dukaamadda iyo gaadiidka kale ee aad u baahan tahay in aad ku qabsato waxyaalaha lagama maarmaanka ah. Meelo badan oo dalka ka mid ah waxaa jira waraaqo sicirka laga dhimey oo lagu raaco basaska iyo tareenadda dhulka hoostiisa mara, bil bilna loo bixiyo.

"Sanaddo yar kadib markaan imid dalka Mareykanka, waxaan go'aan ku gaarey in ay tahay waqtigii aan gadan lahaa baabuur.Markaan deyn ka dalbadey ganacsade baabuur, qofkii deynta masuulka ka ahaa wuxuu I weydiiyey in aan hadda ka hor wax deyn ah qaatey.

Waxaan ku iri waan qaatey waxaanan tusay deyntii IOM ee aan bixiyey. Sababtaan u tusay waxaa weeye in aan tuso in aan deynta bixin karo, deyntii aan dalbadey waa la ii ogolaadey."





Taleefoonka—Xusuusnow teleefoonadda dibedda loo diro in ay aad qaali u yihiin. Waxayna xoogaa ka raqiisan yihiin maalmaha Sabtidda, Axadda iyo waqti danbe habeenkii.

Meelaha Laga Addeegto

Waxaa jira Suuqyo ama dukaamo badan oo kala duwan, shaqooyinka iyo alaabta laga helona wey ku kala duwan yihiin. Halkaan waxaan ku soo sheegi doonaa afar nooc oo ah suuqyadda laga adeegto:

Suuq wayne (Supermarkets)—Dalka Mareykanka aad bay caan uga yihiin dukaamada noocaan ah ee lagu gado cuntooyin kala duwan. Waxaa kaloo lagu gadaa alaabta wax lagu nadiifiyo, alaabta la isku qurxiyo, joornaalada, dharka, alaabta guryaha iyo daawo aan dhakhtar kuu soo qorin. Dadka intiisa badan waxay isticmaalaan waraaq yar yar oo qiimaha wax la isaga dhimo (coupon) iyo alaabta xaraashka ah ee lagu gado Suuq weynaha (Supermarket).

Dukaamada waaweyn oo laamo badan leh (Department Stores)—Dukaamadaan waxay gadaan dhar, alaabta guryaha (sida Armaajooyinka iwm.), qalabka korontada ah ee lagu isticmaalo guryaha, qalabka isticmaalka guryahaiyo abuurka dhirta, kabaha iyo qalab kaloo tiro badan. Qaar ka mida dukaamadaan waa dukaamadda qiimahoodu jaban yahay.

Dukaamada lagu gado alaabta la soo isticmaalay (Thrift shops)—Dukaamadaan waxay gadaan alaabta la soo isticmaalay oo qiimo aad u raqiisa ku iibiyaan. Dadka intiisa badan way ku faraxsan yihiin in ay helaan meelo ka baayactami karaan oo qiimo jaban.

Dukaamada gada cuntada jinsiyadaha kale—Dukaamadaan waxaa lagu gadaa cuntooyin u khaas ah mujtamac isku dhalasho ah oo meel degan. Dukaamadaan waxaa iska leh dad qaxooti ahaan jiray. Waxaa laga yaabaa in aad ka hesho cunto aad ku isticmaali jirtay dalkaagii.

Ganacsiga lagu sameeyo guriga deydkiisa ama garaashka—Alaabtaan waxaa lagu soo qoraa oo lagu xayaysiiyaa jornaalka ama calaamad lagu soo qoro guryaha agagaarka degmadda ee muujinaysa in alaab lagu gadayo agagaarkaaga. Alaabtaa waxaa iska gadaya dadka degan guryaha, inta badana ku gada qiimo aad u jaban, waana meelaha ugu fiican ee laga gato alaabta guryaha ama dharka.

Canshuurta libka

Goboladda intooda badan dadka wax gadanaya waxay bixiyaan canshuur ka baxsan shayga ay gadanayaan qiimahiisa. (waxaa laga yaabaa alaabta qaarkeed in laga daayo canshuurta, sida cuntada iyo daawada). Canshuurtaan waa qiimaha shayga oo lagu dhufto boqolkiiba, waxaana lagu xisaabiyaa rajiistarka lacagta cadaanka ah (kaash). Qiimaha ku dhegan alaabta dhex tala dukaanka canshuurtu kuma jirto inta badan.

Canshuuraha Kale

Dawlada dhexe iyo tan gobolada ee magaalooyinka qaarkood waxay aruuriyaan canshuurta dakhliga. Dowlada hoose waxay aruurisaa canshuurta guryaha, meelaha dhismuhu ka dhisan yahay sida xafiisyadda, dhulka banaan iyo mararka qaarkiisna iyadoo ay canshuurto lahaanshaha baabuurta. Canshuurahaan waxay caawiyaan ama taageero u yihiin dadka dan yarta ah markii lagu daro qaxootiga.

Bangiyadda

Dadka Mareykanka guud ahaantii si ay uga ilaaliyaan lacagtooda in ay ka dhunto ama laga xaddo waxay dhigtaan hay'addaha maaliyada sida Bankiyada, ururadda keydka iyo amaahda iyo ururada deymaha siiya intii ay guriga ku haysan lahaayeen ama jeebka ku qaadan lahaayeen. Hay'addaha maaliyadda qaarkood waxay bixiyaan dulsaar hadii aad furato koontooyinka qaar ka midda, waxayna kaa qaadaan lacag ay ku qabanayaan sida koontada shakhsiga ama kaarka daynta lagu qaato. Dadka intiisa badan waxay furtaan koontadaan si ay ugu qoraan jeegag ay ku bixiyaan biilasha lagu leeyahay.

Isticmaalka Deynta

Dalka Mareeykanka kaarka deynta in wax lagu gato waa wax caadi ah oo dadka oo dhan isticmaalaan, kadibna waqti ayey deyntii isaga bixiyaan. Shirkado badan oo ganacsi ayaa u ogolaada dadku in ay alaabta amaah ku qaataan si ay u gataan alaab aanay awood u lahayn in ay lacagtooda hal mar wada bixiyaan. Dadka cusub ee dalka yimaada waa in ay ka taxadiraan isticmaalka kaararka deynta ama qorshaha deynta ee shirkaduhu qabaan in aad ku qaadato qalabka guryaha sida, firintijeerka iyo makiinadda cuntada ama alaabta guriga la dhigto sida, kuraasta, miisaska ama baabuurta. Sababtu waxaa weeye qiimaha alaabtaan oo aad qaali u ah iyo dulsaarka oo badan. Haddii qofka alaabta daynsaday lacagtii uu iska bixin waayo shirkaddu waxay qaadanaysaa alaabtii adigoon laguu soo celin lacagtii aad horey u bixisay. Waxaana suurtogal ah in aadan mar dambe dayn uga helin dalka mustaqbalka soo socda. Sidaas daraadeed ka taxadar xayaysiinta loo samaynayo kaarka daynta kuwaasoo «fiicnaan lahayd in ay run yihiin waxa ay xayaysiinayaan».

Qaxootigu waa in ay qayb ka midda dakhligooda meel dhigaan si ay dib ugu bixiyaan deyntii looga bixiyay tigidhka diyaaradda ay ku soo raaceen markii ay imaanayeen dalka Mareykanka. Tani waxay kaa caawinaysaa sidii aad uga dhisan lahayd aaminaad kuwa amaahda bixiya ee dalka markii aad u baahato. Xasuusnow in ay sahlan tahay in aad deyn hesho hadii aad tusto in aad bixisay deen aad hore u qaadatay. Waydii hay'addaada dib-u-dejinta warbixin ku saabsan sidii aad u bixin lahayd deyntii hore ee tigidhka.

98

BEST COPY AVAILABLE

Adeegyadda Dib-u-dejinta iyo Marxaladaha kala guurka: Faala ka bixin (muraajaco)

Casharkeenii 2aad (Doorka hay'adda dib-u-dejinta) waxaynu ku soo falanqeynay adeegyadda aad xaqa u leedahay in aad ka hesho hay'addada dib-u-dejinta. Masuuliyadda adiga ayaa iska leh sidii aad uga faa'iidaysan lahayd ama u isticmaali lahayd adeegyadaan, taasoo kuu soconeysa wakhti yar oo aad u kooban. La socodsii hay'adadda dib-u-dejinta horumarka aad ka gaartay dib u degaaga, ula hadal si daacad ah shaqaalaha hay'adaada una sheeg waxa aad jeceshahay ama damacsantahay, iskuna day in aad la timaado qalbi furnaan iyo dabacsanaan.

Casharkeenii 6aad (Shaqada) waxaynu ku soo sharaxnay masuuliyada shaqada kaa saaran. Inkastoo laga yaabo in shaqadaada ugu horeysa aysan ahayn mid ku qancisey ama takhasuskaaga aan ahayn, xasuusnow in qofka kale ee shaqada labaad ku siinayaa uu tixgelineyo warbixinta lagaa bixiyay sidii aad hawshaadii hore u gudatay. Aad bay muhiim u tahay in aad shaqo kasta ee aad hesho si fiican u qabato.

Casharkeenii 7aad (Waxbarashada) waxaanu ku soo falanqaynay masuuliyadda waalidka ka saaran waxbarashada caruurtooda dhigata iskuulka. Isku day in aad ka qaadato qeyb wax ku ool ah caruurtaada waxbarashadooda.

Sharciyadda Mareykanka

Qaxooti ahaan, waxaad xaq u leedahay xaquuq la mid ah kan qofka kale ee ku nool dalka Mareykanka gudihiisa. Dadka dalka degan oo dhan waxay xaq u leeyihiin sidii loogu ilaalin lahaa xaquuqdooda shaqada, guryeynta, iyo waxbarashada. Waxay kaloo xaq u leeyihiin adeegyadda dowlada, iyadoo aan loo kala firinayn midabka, diinta, jinsiyada, dhalashadadii hore, lab ama dhedig iyo waxyaabo kale oo lagu kala duwan yahay. Sharciyada dalka Mareykanka waxaa loogu tala galay in ay ilaaliyaan xaquuqdaada. Haddii aad degan tahay dalka Mareykanka way wanaagsan tahay in aad aqoon aasaasi ah u leedahay waxa aad xaq u leedahay, xaquuqda aad leedahay iyo masuuliyaddaha ku saaran.

Hadii lagugu soo eedeeyo dambi in aad ka gashay dalka Mareykanka, waxaad ogaataa in aadan dambiile ahayn ilaa iyo intii lagugu soo cadeeyo in aad gashay dambigaas. Waxaad xaq u leedahay in aad qabsatid qareen (abukaate) ku matala ama kuu dooda markii maxkamadda la tago. Haddii aadan awoodin in aad iska bixiso lacagta qareenka maxkamadda ayaa mid ku siinaysa ku matala ama kuu dooda. Xasuusnow haddii aad jabiso sharci, hay'addaada dib-u-dejintu "ma xalin karto" dambigii mana soo fara galin karto.

Sharciyadda Mareykanku wey ka duwanaan karaan kuwa dalkaaga

- Dalka Mareykanka waa sharci darro in meelo badan oo dadweynuhu isugu yimaado sigaar lagu cabbo, sida tiyaataradda iyo xafiisyadda. Meelo kale sida makhaayaddaha waxaa jira meelo gooni ah oo lagu cabbo sigaarka, haddaba haddii aad sigaar cabtid waydii hay'addada dib-u-dejinta sharciyada ka yaala sigaar cabidda meesha aad ku nooshahay.
- Waa sharci darro in aad gadato ama gado ama isticmaasho daroogo maskaxdaada doorisa ama aad qabatinto mukhaadaraad xukuma naftaada. Waa in aad hay'addaada dib-u-dejinta weydiisaa in dalka Mareykanka ay ka yihiin sharci daro mukhaadaraad laga yaabo in aysan sharci daro ka ahayn dalkaagii.
- Waa sharci darro in aad baabuur ku wado dalka adigoon haysan laysanka baabuurta lagu wado ee dalka Maraykanka. Mana wadi kartid baabuur haddii aad khamro soo cabtay.
- Gobollada dalka Maraykanka inta badan waxay qabaan sharciyo ilaalinaya in baabuurta lagu kaxeeyo caruurta. Tusaale ahaan, waalidka waa in ay u xiraan caruurta suunka amaanka ee baabuurta iyo in ay kuraasta loogu tala galay ilmaha dhashay ee aadka u yar, galiyaan baabuurtooda. Waxaa kaloo jira sharciyo ku saabsan suunka amaanka ee dadka waaweyn.
- Waxaa sharci darro ah in aad disho xaaskaagga ama ninkaaga iyo caruurtaada.
- Galmo in lala sameeyo caruurta ka yar 18 sanno waa sharci darro, sharcigaas waxaa looga dhaqmaa gobollo badan oo dalka ka mid ah.

- Hadal gaf ah ama shukaansi aan raali la isaga ahayn ee ka dhex dhaca dad isla shaqeeya (sexual harassment) waa sharci daro.
- Qofka labka (nin) ah ee qaxootiga ah ee da'diisu u dhaxaysa 18 ilaa iyo 25 jir, waxaa laga doonayaa in uu iska diiwaan galiyo hay'addaha dowladda haddii loo baahdo in uu ka qayb galo shaqooyinka la soo soocay oo loogu wici karo, sida militarigga markii loo baahdo ama waqti dagaal ay tahay. Dadka ka shaqeeya ciidamada oo dhan waa dad iskood isu qoray (volunteers) waqtigaan hadda lagu jiro.
- Waa sharci daro in meela badan ka ugaarato ama ka kaluumaysato adigoon shati u haysan. Waa in aad barataa sharciyadaan iyo kuwa kale ee la xiriira.

Dhalashada Maraykanka iyo Aqoonsiga sharciga ah

Aqbalidda lagu aqbalo qaxooti ahaan macnaheedu waxaa weeye si rasmi ah ayaad u degi kartaa dalka, kadibna dhalashadda Mareykanka ayaad dalban kartaa. Sanadkaaga ugu horeeya waxaad dalka ku joogaysaa sharciga qaxootiga (I-94). Waxaa wanaagsan in aad mar walba qaadato sharcigaaga (I-94) si haddii loo baahdo aad u cadayso sharciga aad dalka ku joogto. Qaxooti ahaan waxaad awood u leedahay:

- In aad u safartid meel kasta oo dalka Mareykanka gudihiisa ah.
- In aad gadan kartid hanti maguurto ah.
- In aad ka shaqaysan kartid.
- In aad iskuul dhigan kartid.

- In aad kafaalo qaadi kartid ama u dalban kartid in laguu keeno xaaskaagga iyo caruurta ka yar 21 sanno, haddii aysan kula socon. Haddii aad u baahatid in aad dalbato caruurtaada la xiriir hay'addaada dib-u-dejinta si ay kuugu sharaxdo nidaamka muhiimka ah ee loo raaco.

Dalka Mareykanka qof walba wuxuu iska leeyahay xoriyad aasaasi ah sida xoriyad aad ku dhiiban kartid fikraddaada (ku qudbayn kartid), xoriyad diineed iyo xoriyad ay isugu yimaadaan oo ku sameystaan urur. Hay'addaha dib-u-dejinta waxay badidood ku xiran yihiin diimaha, laakiin adiga waajib kuguma aha in aad qaadato diintoodda kugumana khasbayaan.

Inta aad haysato sharciga qaxootiga ma heli kartid baasaboorka Mareykanka, mana ku biiri kartid ciidamadda xoogga. Kama qayb gali kartid doorashada dalka, mana ka shaqeyn kartid shaqooyinka dowladda ee loogga baahan yahay dadka haysta dhalashadda dalka Mareykanka ah. Dalka dibadiisa uma socdaali kartid ilaa aad ogolaansho ka hesho hay'adda socdaalka iyo hijradda (INS). Haddii ay muhiim tahay in aad dhoofto ama socdaasho, hay'adda dib-u-dejinta ayaa kuu sharaxaysa siddaad ku heli lahayd waraaqaha rasmiga ah ee kuu ogolaaneysa in aad socdaali kartid. Haddii aad ku noqoto dalkaagii hooyo inta aad heysato sharciga qaxootiga waxaa laga yaabaa in aan laguu ogolaan in aad Mareykanka dib ugu soo noqoto.

Hal sanno kadib markaad deganaatid dalka Mareykanka waxaad dalban kartaa degenaanshaha rasmiga ah ee dalka (permanant resident). Markii aad hesho degenaanshaha rasmiga ah waad u socdaali kartaa dibedda, laakiin kama maqnaan kartid dalka in ka badan hal sanno. Waad ku biiri kartaa ciidamadda xoogga. Kama qayb gali kartid doorashadda dalka uma shaqayn kartid dowlad kale, mana qaban kartid shaqooyinka dowladda ee loogu tala galay dadka dhalashada Mareykanka heysta. Hay'addaada dib-u-dejinta ayaa kuu sharaxaysa sida lagu helo degenaanshaha rasmiga ah.

Markaad degenaatid dalka Mareykanka muddo afar sanno iyo bar waxaad dalban kartaa dhalashadda dalka Mareykanka. Hay'addaada dib-u-dejinta ama hay'adda socdaalka iyo dhalasho siinta (INS) ayaad ka heleysaa warbixinta ku saabsan sidii aad ku heli lahayd dhalashada dalka Mareykanka. Waxyaalaha lagaaga baahan yahay waxaa ka midda in aad leedahay qalbi saafi ah iyo dabeecad fiican, in aad taqaano luuqadda Ingiriiska ee aasaasiga ah, taariikhda iyo dowladda dhismaheeda. Dadka dhalashada qaata waxay ku istareexaan xaquuq ama fursaddo la midda midda ay haystaan dadka ku dhashay dalkaan.

105

Dadka degan dalka Mareykanka waa qaran ka soo haajiray wadamo kale oo la yimid dalka dhaqamo, caadooyin iyo siyaabo ay u dhaqmaan oo u gooni ah bulsho kasta. Taas macnaheedu waxaa weeye ma jiro hal dhaqan oo laga siman yahay ee dadku wada isticmaalo. Haddaba waxaa jira heerar ama dariiqyo ama dabeecaddo la tixgeliyo lana ogol yahay in la isticmaalo dalka Mareykanka, waxaana laga yaabaa in ay ka duwan yihiin dhaqanka iyo caadooyinka dalkaagga. Qaar ka midda caadooyinka iyo dabeecadaha dalka waxay u kala muuqdaan wax cajaa'ib ah, misna khaladna ku ah dalkaagga dabeecadda loogga dhaqmo. Haddaba la qabsiga dhaqanka Mareykanka wuxuu ku xiran yahay sida aad wax uga baratid habka ay dadku u dhaqmaan ama waxyaabaha ay qiimeyaan. La qabsiga dhaqanka macnaheedu ma aha in aad iska ilowdo dhaqankaagii iyo caadooyinkaagii aad aqoonsanayd.

Dadka Mareykanka ah waxay qiimeeyaan qanuunka sinaanta dadka oo dhan ha ahaato xag jinsiyadeed, diineed, lab iyo dhedig iyo asalkaagii hore, waxayna rumaysan yihiin in kuligeenba aan haysano xuquuqda aadanaha iyo dhowritaan ama difaacid buuxda. Dadka Mareykanka inta badan waxay u muujiyaan fikrad diidmo ah oo buuxdo qofkii ku dhaqmo naceyb, ama kala sooçid (midab kala sooc) ku sameeya qof kale. Waxaa sharciyo adag oo ka ilaalinaya qofka in lagu sameeyo kala soocid xagga guryeynta iyo meelaha laga shaqeeyo kaasoo ku xiran midabkaaga, diintaada ama asalkaagii hore.

Kaalinta ay ragga iyo dumarku kaga jiraan mujtamaca dalkaagga waa suurtogal in ay kala duwan yihiin, laakiin dadka Mareykanka waxay rumaysan yihiin sinaan ragga iyo dumarka, waxayna qadarin weyn siiyaan in qofku (lab iyo dhedigba) uu gaaro isku filaansho iyo madaxbanaani buuxda. Waxaa suurtogal ah kaalinta aad ku leedahay qoyskaagga in ay isbedesho taasuna waa mid caadi ah oo la xiriirta dib-u-dejinta. Hal mushaar (dakhli) ka badan waa lagama maarmaan in qoysku helo si ay suurtogal u noqoto in kharashka baxaya iyo dakhligu isu la'ekaadaan. Si loo helo midaan, labada waalidba waa in ay shaqeeyaan, qaybsadaana sidii ay caruurta u wada xanaaneyn lahaayeen.

Sharciyo ayaa u degsan xiriirka qoyska sida xeerka qoyska ee ka mamnuucaya in la dilo ama la garaaco xaasaska iyo caruurta. Waxaa jira oo kale sharci diidaya in caruurta lagu edbiyo garaacid (jir dil). Haddii aadan cunugaagii xanaaneyn ama aadan si fiican uga taxadirin

waxaa suurtogal ah in loo arko in ay tahay sharciga «caruurta dayacan» kaasoo keeni karta in ay soo fara galiyaan hay'addaha caruurta ilaaliya.

Waxaa jira waxyaalo badan oo dadku qalad ka fahmay nolosha taala dalka Mareykanka, sababtu waxaa weeye inta badan filimada iyo telefishinkuba ma soo bandhigaan aragti isku dheeli tiran ee nolosha dalka. Qalabkaa warbaahintu caadiyan waxay muhiimada siiyaan in ay wax maaweeliyaan intii ay waxbari lahaayeen, mana meteli karaan dadka Mareykanka ah, mana qiimeyn karaan dabeecadahooda iyo waxyaalaha xaqiiqdu tahay. Dadka cusub ee dalkan yimaada waxay qabaan waxyaalo badan oo ay qalad ka fahmeen. Waa in aad isku daydaa in aad fiiro dheer u yeelatid ama la qabstid isbedelada. Hadaba waxaa ugu fiican ee aad ku bilaabi karto noloshaada cusub waa adigoo su'aalo waydiiya dabeecadihii aad fahmi waydo.

109

La qabsiga dhaqan argagaxa

Dhaqan ka didida waxaa ka mid ah dareenka caadiga ah ee qofku dareemo in uusan awood laheyn (cawimaad uu u baahan yahay) ama niyad jaba markuu dal cusub oo uusan luuqada looga hadlayo ama dhaqanka looga dhaqmayo toona aqoonin. Qof kasta oo raba in uu ku noolaado dal cusub wuxuu marayaa heerar kala duwan oo dhaqan didmo ah; calaamadaha lagu garto waxaa ka mid ah:

- Qalbi jab ku dhaca oo aadan awood u yeelanayn in aad sameyso nolol maalmeedkii sida, dukaamada oo aad alaab ka soo gado iyo gaadiidka dadweeynaha oo aad isticmaasho.
- In aad hurdo seexan weydo ama aad dareento daal maalintii.

- In xanaaqaagu bato ama aad aragto waxyaalo badan oo kaa xanaajiya.
- Niyad aad u hayso cunto cunida oo aad kaaga yaraata ama aadaan kala jaclayn wax kasto.

Dhaqan didmadaan aan kor ku soo sheegnay ma aha wax waligood ku haynaya, wayna kaa dhamaanayaan waqti ka dib. Dad badan oo dalka ku cusub ayaa soo maray ka argagaxa dhaqanka lakiin waqti yar dabadeed way ku xoogaysteen awoodna u heleen in ay la qabsadaan dhaqamaddaan kala duwan. Dhaqan kasta ama qof walba wuxuu leeyahay nidaam u gooni ah oo ay ula qabsadaan dhaqan argagaxa. Waxaa fiican ama ku caawin karta haddii aad dareento dhaqan diidmo in aad dib ugu noqoto wax caado kuu ahayd oo aad uga heli jirtay ama aad dhageysato muusikada aad taqaano oo aad jeceshahay. Hal xeel oo ay isticmaaleen inta badan dadkii cusbaa ee dalka yimid waxay ahayd in ay ku biireen ururrada Danaha guud ee mujtamacaaga ama dadka aad isku dhalashada tihiin oo ay hore u abaabuleen dadkii ka soo horeeyay.

Nolol in dib loo dhisto waxay u baahan tahay deganaansho iyo dadaal dheeraad ah. Maalmahaagu waxay noqon doonaan kuwa aad mashquul u ah, sida aad u muujiso firfircooni iyo sida aad u qaadato masuuliyada noloshaada ayaad guul ku gaari kartaa barnaamijkaaga dib-u-degidda.

Talooyin kuu sahlaya nolosha maalin kasta

Nidaam aan sharci adag lagu dabakhin—Dadka Maraykanka ah waa dad iska caadi ah oo aan laheyn dariiq iyo nimaad loogu soo hagaago. Meelaha dadku isugu yimaadaan inta badan dadku waxay isticmaalaan qofka magaciise hore, laakiin haddii ay tahay shaqo inta badan magaca u danbeeya ayaa la isugu wacaa, gaar ahaan inta aan la iskiin barin si rasmi ah. Meelaha shaqadda horjoogayaasha ama dadka aad isla shaqeeysaan inta badan waxay jecelyihiin in loogu yeero magacooda hore. Dhakhtarka iyo dadka shahaadooyinka sare haysta (Ph.D.), ayaa caadiyan darajadooda loo isticmaalaa wakhtiyadda shaqadda la isugu yimaado. Ilka cadeynta iyo in qofka la salaamo (afka laga salaamo) dadka aad taqaano iyo kuwo kale ee aadan aqoon way fiican tahay.

Dhowrista Waqtiga—Dadka Mareykanka si aad ah ayey uqiimeeyaan waqtiga, waxayna isku dayaan in ay waqtiga ku yimaadaan dadka kalena waxay ka filayaan in ay saas yeelaan. Waa muhiim in balan la sameysto laguna yimaado meelaha gaarka ah sida meelaha ganacsiga iyo xarumaha dadweynaha. Meelaha qaarkood sida xafiisyada ganacsiga laguma qaabilayo haddii aadan balan laheyn. Haddii aadan ku imaan karin balantii aad sameysateyama aadisleedahay waad ka soo daaheysaa in ka badan 15 daqiiqo, waa in aad wacdaa oo sharaxdaa wixii ku xayiray.

Kali ahaan aan ciddina ku soo fara gelin—Inkastoo dadka Mareykanka ah yihiin dad waji furan hadana waxay aad u qiimeeyaan in ay arrimahoodu gaar u yihiin oo aan cid kale soo fara gelin. Guryaha iskama soo

booqdaan iyagoon balan laheyn ama aan la soo casumin. Ka hadalka dhaqaalaha (maaliyada) qofka aad bay u tahay wax shakhsigaas u gooni ah, weydiinta inta uu mushaar u qaato, gurigiisa qiimaha uu ka bixiyey, baabuurkiisa qiimihiisa iwm, waxay u muuqataa akhlaaq xumo. Sidoo kale edebta kuma jirto in qof aadan aqoon ama mar dhow la kulantey weydiiso arrimihiisa u gaarka ah.

Nadaafadda qofka—Waxaa caadi u noqotay dadka Mareykanka ah in ay qubeystaan malin kasta, ilkaha iska cadeyaan, timaha shaambo iskaga dhaqaan, markastana dharka iska dhaqaan. Waxaa jira oo dukaamada lagu gadaa in ka badan boqolaal badeeco sida, barafuunada dhidida la isaga carfiyo, daawadda ilkaha lagu cadeydo, shaambooyin, saabuunta wax lagu nadiifsado oo loo diyaariyey nadaafada qofka.

Bakhshiish—Waa caado in la siiyo bakhshiish 15% ama 20% biilka makhaayadda, qofka adeegaha ah ee makhaayadda ka shaqeeya iyo tagsiilaha. Ma haboona in laaluush la siiyo askarta, booliiska iyo dadka ka shaqeeya xafiisyadda dowladda si aad uga mahadcelisid caawintuu kuu sameeyey.

Sigaar Cabidda—Dadka Mareykanka inta badan sigaar ma cabaan, waxayna ka rejeynayaa in dadka cabbo ay xaq dhowraan oo aaney kaga cabin gurigooda iyo meesha ay ka shaqeeyaan. Waxaa kaloo jira sharciyo mamnuucaya in sigaar lagu cabbo meelaha dadweynuhu isugu yimaadaan sida, dukaamadda, basaska dadweynaha iyo makhaayadaha qarkood oo loo ogol yahay meel ka midda in lagu cabbo.

Khamro (aalkolo)—Inkastoo khamri lagu gado dalka, waxaa jir sharciyo maamula isticmaalka iyo gadidda khamriga. Sharciyaddan goboladda dalka wey ku kala duwan yihiin, meelaha qaarkoodna sharciyadaan aad bay u adag yihiin. Dalka oo dhan waa ka sharci darro in qofku isagoo cabsan ama korkiisa ku jirto khamro aad gaari (baabuur) wado. Haddii aad wado adoo cabsan waxaa lga yaabaa in aad xabsi ku gasho ama lagu ganaaxo ama shatiga (leysinka) lagaa qaado. Caruurta looma ogola in ay cabaan khamriga ilaa ay ka gaaraan da'da 18 ilaa 21 sanno, Waxayna ku xiran tahay da'da u taala gobolkaas. Caruurta da'doodu intaas ka yar tahay looma ogola in ay xataa ka soo gadaan dukaanka khamro. Xusuusnow in aysan ceeb aheyn in haddii khamri lagu siiyo aad diidi karto, adoo u sheegaya in aadan cabin khamri.

Nabadgalyadda—Inkastoo dambiyadda iyo rabshooyin ka jiraan dalka, way kukala badan yihiin goboladdu. Meel kasta oo aad degan tahay waxaa lagaa rabaa in aad taxaderto sida, in aad qufusho gurigaagga iyo gaarigaagga. Waligaa lacag badan oo cadaan ah ha ku qaadin gacanta, waana in aad ogaataa agagaarkaaga kuwa xun si aad isaga ilaaliso habeenkii.

Waraaqaha muhiimka ah in aad qaadato—Markasta waa in aad qaadataa masawirka waraaqahaaga aqoonsiga sida, waraaqda (I-94) sharciga qaxootiga. Inta aad dalka si fiican ula qabsaneyso waxaa wanaagsan in aad jeebka ku qaadato magaca, cinwaanka, iyo teleefoonka hay'addaada dib-u-dejinta. Haddii aadan aqoon ku hadalka af Ingiriisiga warqad ku qoro cinwaankaaga, telefoonkaaga iyo cinwaanka qofka aad booqaneyso.

"Dareenkii aan dalkaan ka qabey hadda waa ka duwan yahay kii aan qabey markii ugu horeysay ee aan dalkaan imid. Markii aan joogay dalka Fiyetnaam (Vietnam), waxaan moodi jirey imaatinka Ameerika in ay tahay janno ama wax muhiim ah. Dad ayaa saas iigu sheekeeyeygeen. Hadda u maleyn maayo in ay u eg tahay janno. Waxay kaliya ka fiican tahay Fiyetnaam (Vietnam)."

"Inkastoo aan ku nool nahay Ameerika, Waxaan weli leenahey xaquuq aan ku xasuusan karno kuna dhaqmi karno caadooyinkeenii. Waxaan weli baranaa sida dadka Mareykanka ah u nool yihiin iyo caadooyinkoodda. Qaar baan raacney kana baraney, Waxaan weli xasuusanahay, aqoonsanahey, qiimeynaana dhaqankayaga. Ku soo dhawaada kuligiin intiina imaaneysa halkaan."

"Kuma baran kartid wax kasta oo ku saabsan noloshaan laba bilood. Waxey qaadataa sanaddo badan."

"Waan is bedeley sanaddihii tagey. Hadda ma dareemo in aan u buko in aan dalkaygii dib ugu noqdo siddii aan dareensanaa markii hore, kamana baqo waxyaalaha igu cusub. Waxaan bartey siddaan ku heli lahaa shaqooyin ka fiican markaan bartey luuqadda Ingiriiska."



BEST COPY AVAILABLE

Dib-u-dejintu waa qorshe dheer. La qabsiga nolosha dalka Mareykankuna waxey kugu qaadan kartaa in ka badan labo ilaa shan sanno. Isku day in aad fiiro dheer u yeelato arrimaha noloshaada khuseeya, iskana ilaali in aad go'aan deg deg ah sameyso kuna dhaqaaq meelihii ama waxyaalihii hamigaagu tiigsanaayey. Waxaa ku caawin kara haddii aad la timaado dhowr waxyaalood: Ula imoow tusna dadka ku caawinaya niyad daacad ah, deganaansho iyo wada shaqeyn fiican. Waa in aad sida qofka Mareykanka ah u aaminsan yahay iskukalsoonaanta iyo xoriyadda buuxda ee qofku ku hogaaminayo naftiisa aad xushmeysaa waxna ka barataa sidii aad isku filaansho u gaari laheyd. Intaan kor ku soo sheegnay waxey si weyn kaaga caawinayaan siddii aad ula qabsan laheyd dhaqanka. Dhaqan kugu cusub wuxuu leeyahay faa'iidooyin fara badan iyo khasaare badan, iyo in aad gaarto meelihii aad hiigsaneysay.

118

BEST COPY AVAILABLE

119

Ka dalbo buuggaan isagoo ku qoran afka Ingiriiska iyo luuqaddo kale cinwaankaan:

Refugee Service Center
Center for Applied Linguistics
1118 - 22nd Street NW
Washington, DC 20037
(202) 429-9292
fax (202) 659-5641

BEST COPY AVAILABLE